

كيف تكون على صواب؟

Sidee sax ku ahaanaysaa?

كيف تكون على حق؟

Sidee xaqa ku haleelaysaa?

كيف تعيش حياتك؟

Sidee noloshaada u noolaataa?

مقدمة

كيف وإلى أين..... كيف بدء الخلق كيف ترتيب المخلوقات ... كيف وجود الزمان والمكان... إلى أين المصير... إلى أين بعد الممات... إلى أين المستقر والمنتهى.... كيف تكون على صواب.... كيف تكون على حق... كيف تعيش حياتك... الجواب الوافي الكافي تجدونه في هذا الكتيب المفيد.

Hordhac

Sidee.. iyo xagee.. Sidee uunku u billowday... sidee uunku isugu xigaa... sidee yahay jiritaanka goorta iyo meesha... xagee baa loo socdaa... xagee la aadayaa dhimashada kadib.... Xagee baa lagu nagaanayaa xageese loo iilanayaa... sidee baad sax ku ahaanaysaa.. sidee baad xaqa ku haleelaysaa... sidee noloshaada u noolaanaysaa... jawaabta dhamaystiran oo kugu filan waxaad ka helaysaa kitaabkan yar ee faa'iidada badan.

توطئة:

الحمد لله الموجود بلا مكان المتزه عن الكيف والأين والأشكال والألوان. والصلاة والسلام على محمد سيد ولد عدنان، وعلى آله وصحبه إلى يوم ينصب للحساب الميزان.

Gogoldhig:

Ilaah baa mahadi u sugnaatay kaas oo jira meel la'aan, kana nasahan qaabka iyo meesha iyo qoolaabka iyo midabka. Salaad iyo salaanna waxay ahaatahay Muxamad korkiisa sayyidkii intii Cadnaan dhalay, iyo ahalkiisii iyo asaxaabtiisii inta laga gaarayo maalinta xisaabta loo taagayo miisaanka.

أما بعد:

فقد تكلم الكثيرون في أمر بدء الخلق ومصير الإنسان بعد الموت، فضلوا وأضلوا عن جادة الصواب، فاقتضى الأمر تبياناً للحق على ضوء ما ورد في كتاب الله تعالى، وفي سنة رسوله المصطفى عليه الصلاة والسلام.

Intaa kadib:

Dad badan baa ka hadlay arrinka billowga uunka iyo halka uu u dhuranayo dadku dhimashada kadib, kolkaas bay lumen kana lunsheen (dadka) waddadii toosnayd, markaas bay lagama maarmaan noqotay in xaqa la caddeeyo, sida ku soo arroortay kitaabka Ilaahay kor ahaayee, iyo sunnada Rasuulka la doortay korkiisa naxariis iyo nabadgelyo ha ahaatee.

ثم إن العقل شاهد للشرع، والشرع لا يأتي إلا بمجوزات العقل، والشرع شرع الله، وهو أعلم بخلقه... لذا كان كلام الله وكلام رسوله حجة يُرجع إليها لمعرفة حقائق الأمور...

Intaa kadib, caqligu wuxuu markhaati u yahay sharciga, sharciguna la imaan mayo wax aan caqligal ahayn, sharciguna waa sharcigii Ilaah, asiga ayaana uunkiisa u ogaal badan.. sidaa darted hadalka Ilaahay iyo hadalka Nabigiisa ayaa xujo ah, taas oo loo laabanyo si loo ogaado xaqeeqada ummuuraha.

والله نسأل، وبمحمد نتوسل، أن يثبتنا على الصراط المستقيم والنهج القويم، إنه على كل شيء قدير.

Eebbe ayaanna waydiisanaynaa, oo Muxamadna ku tiirsanaynaa, in uu Eebbe inagu sugo waddada toosan dusheeda iyo qaabka hagaagsan, asiga ayaa wax walba awoodee.

كيف بدء الخلق؟

قال رسول الله ﷺ عند ما سئل عن بدء الأمر: "كان الله ولم يكن شيء غيره، وكان عرشه على الماء، وكتب في الذكر كل شيء، ثم خلق السموات والأرض" رواه البخاري.

Sidee uunku ku billowday?

Wuxuu yiri: Nabigii Ilaah Nabadgelyo iyo naxariisi korkiisa ha ahaatee, kolkii la waydiiyay billowgii nolosha: "Eebbaa ahaaday, wax kale oo aan asiga ahayna ma ahaan, carshigiisuna wuxuu ahaaday biyaha dushooda, wuxuuna ku qoray looxa wax kasta, kadibna wuxuu abuuray samooyinka iyo dhulka" waxaa soo weriyay Bukhaari.

أجاب الرسول ﷺ على هذا السؤال بأن الله لا بداية لوجوده (أي أزلي)، ولا أزلي سواه، وبعبارة أخرى: في الأزل لم يكن إلا الله تعالى، والله تعالى خلق كل شيء.

ومعنى: خلق كل شيء، أنه أخرج جميع الموجودات من العدم إلى الوجود.

Nabigu wuxuu uga jawaabay - nabadgelyo iyo naxariisi korkiisa ha ahaatee - su'aashan in aan Eebbe jiritaankiisu bilow lahayn (oo uu soojireen yahay), soojireen aan asiga ahayna ma jiro, ujeedadu waa: in kolkii horeba aanay jirin wax aan Ilaah ahayn kor ahaayee, Eebbana kor ahaayee asiga ayaa uumay wax walba. Wax walba asiga ayaa uumayna, waxaa looga jeedaa: in uu asigu ka soo saaray inta nool oo dhan la'aan, oo uu usoo saaray jiritaanka.

والله تعالى حي لا يموت، لأنه لا نهاية لوجوده (أي أبدي)، فلا يطرأ عليه العدم، إذ لو وجد بعد عدم لاستحال عليه القدم (أي الأزلية).

Eebbana kor ahaayee waa noole aan dhimanayn, maxaa wacay dhammaad malaha jiritaankiisu (oo waa sii jireen), kolka ku soo derrin mayso la'aantu, maxaa wacay haddii la heli lahaa la'aan kadib, waxaan suurtagal u noqon lahayn horraynta (oo ah soojireenka).

وحكم من يقول: "الله خلق الخلق فمن خلق الله" التكفير قطعاً، لأنه نسب إلى الله تعالى العدم قبل الوجود، ولا يقال ذلك إلا في الحوادث أي المخلوقات، فالله تعالى واجب الوجود (أي لا يتصور في العقل عدمه)، فليس وجوده كوجودنا الحادث، لأن وجودنا بإيجاده تعالى، وكل ما سوى الله جائر الوجود (أي يمكن عقلاً وجوده بعد عدم، وإعدامه بعد وجوده) بالنظر لذاته في حكم العقل.

Xukunka qofkii leh: "Eebbe ayaa abuuray uunka, hadaba yaa Eebbe abuuray" waa in la kufrinaayo shakila'aan, maxaa yeelay Eebbe kor ahaayee buu u saarshay la'aan jiritaanka ka hor, lagumana yiraahdo sidaa wax aan ahayn dhacdooyinka uunka, kolka Eebbe kor ahaayee jiritaankiisu waa waajib oo ah (in aan maskaxda lagu malayn karin la'aantiis), kolka jiritaankiisu sidi jiritaankeenna dhacdada ah maaha, maxaa wacay jiritaankeenna Eebbe ayaa keenay kor ahaayee, wixii aan Eebbe ahayna jiritaankiisu waa bannaanyahay oo ah (in ay garaadka suurta gal ku yahay jiritaankiisu la'aan kadib, iyo la'aantiisa jiritaankiisa kadib) haddii laf ahaantiisa loo eego sida garaadku goynayo.

واعلم أن أقسام الموجود ثلاثة:

الأول: أزلي أبدي: وهو الله تعالى فقط، أي لا بداية ولا نهاية لوجوده.

وحكم من يقول: "إن هناك شيئاً أزلياً سوى الله" التكفير قطعاً، ولذلك كفرت الفلاسفة باعتقادهم السفهية أن العالم قديم أزلي، لأن الأزلية لا تصح إلا لله تعالى فقط.

Waxaadna ogaataa in qaybaha jiritaanku saddex yahay:

Kan laad: waa soo jireen siijireen ah: waana Eebbe waynaayee kaligiis, billow iyo dhammaad ma laha jiritaankiisu.

Xukunka qofkii yiraahda: "waxaa jira wax soo jireen ah oo aan Eebbe ahayn" waa kufrin shaki la'aan, sidaa darteed, falaasifadu way kufriseen waxaana ugu wacan ictiqaadkooda doqonnimo ee ah in caalamku duq soojireen ah yahay, maxaa yeelay soojireennimadu cid aan Eebbe waynaayee kaligiis ahayn uma ansaxayso.

والثاني: أبدي لا أزلي: (أي أن له بداية ولا نهاية له)، وهو الجنة والنار، فهما مخلوقتان (أي

لهما بداية)، إلا أنه لا نهاية لهما (أي أبديتان)، فلا يطرأ عليهما خراب أو فناء لمشيئة الله

بقاءهما، أما من حيث ذاتهما فيجوز عليهما الفناء عقلاً.

Kan 2aadna: waa siijireen mana aha soojireen, oo ah (in uu billow leeyahay dhammaadna uusan lahayn), waana jannada iyo naarta, waana la uumay labadaba taas oo ah (in ay billow leeyihiin) hase ahaatee, dhammaad malaha, taas oo ah (in ay siijireen yihiin), sidaa darteed, kusoo darrin maayo baaba'u ama dhammaadku maxaa yeelay Eebbe ayaa doonay in ay siijiraan, haddiise laf ahaantooda la fiirsho waxaa garaadka ku bannaan in ay dhammaadaan.

والثالث: لا أزلي ولا أبدي (أي أن له بداية وله نهاية)، وهو كل ما في هذه الدنيا من السموات السبع والأرض، فلا بد من فنائهما وفناء ما فيهما من إنس وجن وملائكة.

Kan saddexaad: Soojireenna maaha siijireenna maaha (maxaa wacay billow ayuu leeyahay iyo dhammaad) waana dhammaan inta dunidan ku sugan ee ah samooyinka toddobada ah iyo dhulka, oo ay lagama maarmaan tahay in ay dhammaadaan ayaga iyo wixii ku dhex nool ee dad iyo jinni iyo malaa'ig ah.

قَدُمُ اللهُ لَيْسَ زَمَانِيًّا

الله تعالى كان قبل الزمان والمكان وقبل الظلمات وقبل النور، فهو تعالى ليس من قبيل العالم الكثيف (كالأرض والحجر والكواكب والنبات والإنسان)، وليس من قبيل العالم اللطيف (كالنور والروح والهواء والجن والملائكة)، أي لمخالفته للحوادث، أي لمخالفته جميع المخلوقات.

Horraynta Eebbe waqtiga kuma xirra

Eebbe kor ahaayee wuxuu jiray goorta iyo meesha ka hor iyo mugdiga iyo ilayska ka hor, kolka asigu kor ahaayee, lama mid aha caalamka culus sida (dhulka iyo dhaxa iyo xidigaha iyo dhirta iyo dadka), lana mid aha caalamka fudud sida (Ilayska, iyo ruuxa, iyo hawada, iyo jinniga iyo malaa'igta) maxaa yeelay wuu ka geddisanyahay dhacdooyinka, taas oo ah in uu ka geddisanyahay uunka oo dhan.

فإن قيل: أليس من أسمائه "اللطيف"؟

فالجواب: أن معنى "اللطيف" الذي هو اسم الله: الرحيم بعباده، أو الذي احتجب عن الأوهام فلا تدركه.

Haddiise la yiraahdo: miyaanay magacyada Eebbe ka mid ahayn "al-ladiif"?

Jawaabtu waa: in looga jeedo "al-ladiif" oo ah magac Eebbe: in uu u naxariisto addoomihiisa, ama uu yahay mid ka qarsoon malaha oo aanuu haleelayn.

فلا نظير له تعالى ولا شبيه في ذاته ولا في صفاته ولا في فعله، لأنه لو كان مماثلاً لمخلوقاته لم يكن خالقاً لها. فالله تعالى متزه عن الاتصاف بالحوادث، وكذلك صفات الله تعالى هي قديمة أي أزلية.

Kolka wax la mid ah ma jiraan, kor ahaayee, wax ekaankiisa ahna ma jiraan, laf ahaantiisa, iyo sifooyinkiisa iyo falalkiisa, maxaa yeelay haddii uu u ekaan lahaa uunkiisa ma uusan ahaadeen kii ayaga uumay.

ولأهمية هذا البحث، قال الإمام أبو حنيفة: "من قال بحدوث صفات الله أو شك أو توقف، فهو كافر" ذكره في كتاب الوصية.

وقال أبو جعفر الطحاوي السلفي: "ومن وصف الله بمعنى من معاني البشر، فقد كفر".

Casharkan mudnaantiisa awgeed ayuu Imaam Abuu Xaniifa yiri: "qofkii yiraahda in sifooyinka Eebbe wax la uumay yihiin ama ka shakiya ama ka joogsada, waa kaafir" wuxuu ku sheegay kitaabka wasiyada.

فائدة لطررد الوسواس

روى مسلم في صحيحه من حديث أبي هريرة رضي الله عنه قال: قال رسول الله ﷺ "لا يزال الناس يتساءلون حتى يُقال هذا: خلق الله الخلق، فمن خلق الله؟ فمن وجد من ذلك فليقل: ءامنت بالله ورسله" ففي هذا الحديث دواء لما يخالج كثيرا من النفوس، ويتحدث به كثير من الناس فيما بينهم، وقد حصل ما تحدث به النبي في الحديث، وقولهم: من خلق الله؟ هو سؤال المحال، وهو كفر.

Faa'iido ku saabsan sida waswaaska laysaga eryo

Waxaa muslim ku soo weriyay saxiixiisa xadiiskii Abii Hurayra Allaha ka raalli noqdee, wuxuu yiri: wuxuu yiri nabigii Eebbe nabadgelyo iyo naxariisi korkiisa ha ahaatee "dadku iswaydiin joojin mayaana inta laga yiraahdo sidan: wuxuu abuuray Eebbe uunka, ee yaa Eebbe uumay? Ee qofkii sidaa dareema ha yiraahdo: Waxaan rumeeyay Eebbe iyo rusushiisa".

Xadiiskan ayaana daawo u ah dareenka nafta taabanaya, ee dadka qaar badan ku sheekaysanayaan, waana dheceen wixii nabigu ku sheegay xaddiiska, hadalkooda ah: yaa Eebbe uumay? Waa su'aal aan caqligal ahayn, waana kufri.

وذلك أن الذي تقتضيه البراهين العقلية والنصوص القرآنية أن صانع العالم يجب أن يكون أزليا، فيستحيل أن يكون له خالق، ثم الأزلي لا يكون إلا أبديا، أي أن الذي لم يسبقه عدم لا يلحقه عدم، فيبين الخالق والمخلوقية اختلاف ظاهر.

Maxaa yeelay sida addillada caqliga ah iyo nusuusta Quraanka ah caddaynayso waa in kii uumay caalamka ay lagama maarmaan tahay in uu soojireen yahay, kolka waxaan caqligal ahayn in uu lahaado uume, intaa waxaa dheer, in soojireenku aanuu ahaanayn wax aan siijireen ahayn, maxaa yeelay wixii aan jiritaan la'aani ka horrey jiritaan la'aani haleelimayso, kolka uumenimada iyo la uumenimada wax wayn baa u dhaxeeya.

فإن كان هذا خطورا يخطر في البال فعلاجه كما أشار إليه هذا الحديث، أن ينحو عن هذا بغيره، أي يشعل فكره بغيره، ويدفعه بما هو المعتقد الصحيح، وليقل: ءامنت بالله ورسله، أو: ءامنت بالله ورسله، فإن هذا ينفعه في قطع هذا الخاطر. والخطر هو ما لا تملك منعه من أن يرد، ويتميز بكونه بلا إرادة، وأما الشكُّ فإرادة.

Haddii uu kolka kaasi yahay wax laabta ku dhacaya, daawadiisu waa sida xaddiiskaasi sheegay, waana in uu ka leexo waxaas una leexo wax kale, oo ku mashquulsho maskaxdiisa wax kale, kuna caabbiyo wixii ictiqaadka saxiixa ah, hana yiraahdo: waxaan rumeeyay Eebbe iyo rusushiisa, ama: waxaan rumeeyay Eebbe iyo Eebbe rusushiisa, kolka kaas ayaa wax taraya si uu isaga ba'sho waswaaskaas. Waswaaskuna waa wax aadan adigu xukumin oo aadan iska reebi Karin dareenkiisa, waxaana lagu yaqaanaa in uu yahay wax aan la iska doonin, laakiin shakigu waa doonis.

تزيه الله عن المكان

الله تعالى غني عن العالمين، أي مستغن عن كل ما سواه، أزلا وأبداً، فلا يحتاج إلى مكان يقوم به أو شيء يُحُلُّ به أو إلى جهةٍ.

In Eebbe laga nasaho meesha

Eebbe kor ahaayee, wuu ka kaaftoonyahay uunkiisa, oo wuu ka deeqtoonyahay wixii asiga ka soo hara, horey iyo hadda kadibba, kolka uma baahna meel uu joogsado ama wax uu dhexgalo ama aag.

ويكفي في تزيه الله عن المكان والحيز والجهة قوله تعالى: ﴿لَيْسَ كَمِثْلِهِ شَيْءٌ﴾ [سورة الشورى:11]، فلو كان له مكان لكان له أمثال وأبعاد: طول وعرض وعمق، ومن كان كذلك كان مُحَدَّثًا محتاجاً لمن حدّه بهذا الطول وبهذا العرض وبهذا العمق، هذا الدليل من القرآن.

Waxaana ku filan nasahidda Eebbe laga nasahayo meesha iyo xaydaanka iyo aagga Hadalkii Eebbe kor ahaayee: ﴿Wax ekaankiisa ah ma jiraan﴾ [suuradda as-shuuraa:11] haddii uu kolka meel lahaan lahaa wuxuu lahaan lahaa ekaan iyo dhinacyo: dherer iyo balar iyo dhumuc, wixii sidaa ahna waa wax la uumay una baahan wixii ku xaydaamay dhererkaas iyo ballacaas iyo dhumucdaas, daliilkanna quraanka ayaa laga soo qaatay.

أما من الحديث فما رواه البخاري وابن الجارود والبيهقي بالإسناد الصحيح أن رسول الله ﷺ قال: "كان الله ولم يكن شيء غيره" ومعناه أن الله لم يزل موجوداً في الأزل ليس معه غيره، لا ماء ولا هواء ولا أرض ولا سماء ولا كرسي ولا عرش ولا إنس ولا جن ولا

ملائكة ولا زمان ولا مكان، فهو تعالى موجود قبل المكان بلا مكان، وهو الذي خلق المكان، فليس بحاجة إليه، وهذا ما يستفاد من الحديث المذكور.

Daliilka xaddiiska ahna waxaa ka mid ah qaarka ay soo weriyeen Bukhaari iyo ibn al-Jaaruud iyo Bayhaqi sanadkuna saxiix yahay in Nabigii Eebbe nabadgelyo iyo naxariisi korkiisa ha ahaatee uu yiri: "**Eebbe wuu jiray wax kalena ma jirin**" oo macnihiisu yahay in uu Eebbe waligiiba jiray markii horaba wax kalena aanay la jirin, ama biyo ha ahaadeen ama dabayl ama dhul ama cir ama kursi ama carshi ama dad ama jinni ama malaa'ig ama goor ama meel, kolka asigu kor ahaayee wuxuu jiray meesha ka hor meel la'aan, waana kii uumay meesha, kolka uma baahna ayada, waxaana taa laga fahmayaa xaddiiska la soo sheegay.

وقال البيهقي في كتابه "الأسماء والصفات": "استدل بعض أصحابنا في نفي المكان عنه بقول النبي ﷺ: "أنت الظاهر فليس فوقك شيء، وأنت الباطن فليس دونك شيء"، وإذا لم يكن فوقه شيء ولا دونه شيء لم يكن في مكان" انتهى.

Wuxuu ku yiri Bayhaqi kitaabkiisa "al-asmaa' was-sifaat": "Qaar asaxaabteenna ka mid ah ayaa u soo daliilsaday si ay Ilaah meesha (makaanka) uga fogeeyaan oraahdii nabiga nabadgelyo iyo naxariisi korkiisa ha ahaatee: "**Adiga ayaa muuqda wax kaa korreeyana ma jiraan, adiga ayaana qarsoon wax kaa hooseeyana ma jiraan**" haddii aanan kolka wax ka korreeyaa jirin, wax ka hooseeyaana jirin ma ahaanin meel (Makaan). Wuu dhamaaday (hadalkiisii).

وهذا الحديث فيه الردُّ أيضا على القائلين بالجهة في حقه تعالى. وقد قال أمير المؤمنين عليّ كرم الله وجهه: "كان الله ولا مكان، وهو الآن على ما عليه كان" رواه أبو منصور البغدادي في كتاب "الفرق بين الفرق".

Xaddiiskanna wuxuu reddinayaa sidoo kale kuwa Eebbe ku sheegaya jihada kor ahaayee. Amiirul Mu'miniin Cali wajigiisa allaha karaameeyee, wuxuu yiri: "**Eebbe wuu jiray ayada oo aan meeli (makaan) jirin, haddana Eebbe waa sidii uu hore u ahaa**" waxaa ku soo weriyay Abuu Mansuur al-Baqdaadii kitaabkiisa "al-Farq bayna al-Firaq".

وليس محور الاعتقاد على الوهم، بل على ما يقتضيه العقل الصحيح السليم الذي هو شاهد للشرع، وذلك أن المحدود محتاج إلى من حدّه بذلك الحدّ فلا يكون إلها.

Ictiqaadka gunuddiisuna baawsi maaha, ee waa waxa uu caqliga saxan ee nabad qabaahi goynayo kaas oo ah markhaatiga sharciga, sidaa darted, waxii xaydaamani waxay u baahanyihiin ciddii ku xaydaantay xaydaankaas marka Ilaah ma ahaanayaan.

فكما صحَّ وجود الله تعالى بلا مكان وجهة قبل خلق الأماكن والجهات، فكذلك يصح وجوده بعد خلق الأماكن بلا مكان وجهة، وهذا لا يكون نفيًا لوجوده تعالى.

Kolka sida uu u sugnaaday jiritaanka Eebbe meel la'aan iyo jiho la'aan inta aan la abuurin meelaha iyo jihooyinka, sidaa oo kale ayaa jiritaankiisu u sugnaanayaa kadib markii la abuuray meelaha meel la'aan iyo jiho la'aan, kaasina ma aha inkiryada jiritaankiisa kor ahaayee.

بيان أن أول المخلوقات الماء

روى ابن حبان في صحيحه من حديث أبي هريرة قال: قلت: يا رسول الله، إني إذا رأيتك طابت نفسي وقرت عيني فأنبئني عن كل شيء، قال: "كل شيء خلق من ماء". وروى السُّدِّيُّ في تفسيره بأسانيد متعددة: "إن الله لم يخلق شيئاً مما خلق قبل الماء". وفي تفسير عبد الرزاق عن قتادة في شرح قوله تعالى: ﴿وَكَانَ عَرْشُهُ عَلَى الْمَاءِ﴾ [هود:7] ما نصه: "هذا بدء خلقه قبل أن يخلق السموات والأرض".

Caddayn in uunka wixii ugu horreeyay ay biyo ahaayeen

Wuxuu ibn Xibbaan saxiixiisa ku soo weriyay xadiiski Abii Hurayra wuxuu yiri: waxan iri: Rasuulkii Ilaahayow, anigu haddii aan ku arko waan isu bogaa laabtuna way ii qabowdaa, ee wax kasta iiga warran. Wuxuu yiri: "wax walba biyo ayaa laga abuuray" Suddi-na wuxuu tafsiiirkiisa ku soo weriyay sanadyo dhowr ah: "In Ilaahay uusan wax uunkiisa ka mid ah abuurin inta uusan biyaha abuurin". Tafsiiirkii Cabdirisaaq ee Qataada-na ee sharaxa qowlkii Alle kor ahaayee: ﴿Carshigiisuna wuxuu ahaaday biyaha dushooda﴾ [Hud:7]. Waxaa lagu sheegay: "Kani waa billowgii uunkiisa intii uusan abuurin samooyinka iyo dhulka".

وأخرج ابن جرير الطبري في تفسيره عن مجاهد رضي الله عنه في قوله: ﴿وَكَانَ عَرْشُهُ عَلَى الْمَاءِ﴾ قال: "قبل أن يخلق شيئاً". وأما ما يروى عن الرسول عليه السلام: "أول ما خلق الله العقل" فهو حديث مُنْكَر.

Ibn Jariir ad-Dabari-na wuxuu ku soo saaray tafsiiirkiisa oo ka soo weriyay Mujaahid Allaha ka raalli noqdee in qowlkii Ilaahay: ﴿Carshigiisuna wuxuu ahaaday biyaha dushooda﴾ wuxuu yiri: "intii aanuu abuurin waxba". Laakiin wax laga soo weriyay Nabiga nabadgelyo iyo naxariisi korkiisa ha ahaatee ee ah: "Wixii ugu horreeyay ee Eebbe abuuray waa caqliga" waa xaddiis munkar ah.

ترتيب المخلوقات

قال الله تعالى: ﴿وَجَعَلْنَا مِنَ الْمَاءِ كُلَّ شَيْءٍ حَيٍّ﴾ [الأنبياء:30]

فالماء أول المخلوقات ثم العرش ثم القلم الأعلى ثم اللوح المحفوظ، ثم خلق الله السموات والأرض.

Iskuxejinta uunka

Eebbe kor ahaayee wuxuu yiri: ﴿Waxaan ka yeelnay biyaha wax kasta oo nool﴾ [al-Anbiyaa':30]. Kolka biyuhu waa uunka wixii ugu horreeyay, kadibna carshiga, kadibna Qalinka sare, kadibna Looxul Maxfuudka, kadibna Eebbe wuxuu abuuray samooyinka iyo dhulka.

فالماء أصل لغيره من المخلوقات، وهو خلق من غير أصل، فبداية العالم من غير مادة، ولا يُحيل العقل السليم وجود أصل العالم من العدم من غير مادة، فالله لا يعجزه شيء، وهو على كل شيء قدير، ﴿إِنَّمَا أَمْرُهُ إِذَا أَرَادَ شَيْئًا أَنْ يَقُولَ لَهُ كُنْ فَيَكُونُ﴾ [يس:82]. وبوجود الماء وجد الزمان والمكان، أما قبل ذلك لم يكن زمان ولا مكان.

Kolka biyuhu waxay asal u yihiin uunka intiisa kale, ayagana waxaa la abuuray asal la'aan, kolka billowga caalamku wuxuu ahaa curiye la'aan, caqliga fayowna diidi maayo jiritaanka asalka curiye la'aan, Kolka Eebbe wax caji gelinaya ma jiraan, wax kastana wuu awoodaa. ﴿Waxkalana maahee, amarkiisu haddii uu doono wax, waa in uu yiraahdo ahaw, kolkaas buu ahaanayaa﴾ (Yaasiin:82). Marka biyaha jiritaankooda awgood ayaa goorta iyo meeshu ahaadeen, laakiin intaa ka hor ma jirin goor iyo meel toona.

فالله أمر القلم الأعلى بأن يكتب على اللوح المحفوظ ما كان وما يكون إلى يوم القيامة. والقلم واللوحة جرمان عظيمان علويان ليسا كأقلامنا وألواحنا. واللوحة ورد في وصفه أنه من دُرَّةٍ بيضاء، حافته ياقوتة حمراء، ومساحته مسيرة خمسمائة عام.

Kolka Eebbe wuxuu qalinka sare faray in uu looxul maxfuudka ku qoro wixii ahaaday iyo wixii ahaan doona inta maalinta qiyaamaha. Looxana waxaa astadiisa ku soo arooray in uu johorad cad yahay, labadiisa dhinacna dahab cas ku wareegsanyahay, ballarkiisuna uu yahay shan boqol oo sano (intii loo socdo).

والسماوات والأرض خلقت بعد هذه الأشياء الأربعة، وذلك بعد خمسين ألف سنة، لحديث مسلم: "كتب الله مقادير الخلائق قبل أن يخلق السماوات والأرض بخمسين ألف سنة".

Samooyinka iyo dhulkana waxaa la uumay afartaa walxaato kadib, waana konton kun oo sano kadib, sida uu caddeeyay xadiiska Muslim: "Eebbe wuxuu qoray maqaadiirta uunka ka hor intii uusan uumin samooyinka iyo dhulka konton kun oo sano".

والسماوات سبع والأرضون سبع، وكل سماء منفصلة عن الأخرى بفراغ واسع، وكل واحدة فوق الأخرى، خلقت في ستة أيام، وكل يوم من هذه الأيام قدر ألف سنة بتقدير أيامنا هذه. فلا يقل قائل: خلق الله العالم في ستة أيام، إنما يقال خلق السماوات والأرض وما بينهما في ستة أيام، كما جاء في القرآن.

Samooyinkuna waa toddoba dhulkuna waa toddoba, samo kastana way ka go'antahay midda kale bannaan ballaran baana u dhaxeeya, mid kastana midda kale bay ku kor aaddantahay, waxaana la abuuray lix maalmood gudohood, maalin kasta oo maalmahaas ka mid ahna waa kun sano oo sanooyinkeenna hadda ah. Kolka yuusan dhihin mid hadlaa: Eebbe wuxuu uunka abuuray lix maalmood gudahood, ee waxaa la yiraahdaa, Wuxuu abuuray samada iyo dhulka iyo waxa ku dhexjira lix maalmood gudahood, sida Quraanka ku soo arooray.

نقد نظرية الانفجار الكبير (Big Bang)

وهذه النظرية الفاسدة تقول بأن الكون كان عبارة عن مادة واحدة مضغوطة، انفجرت انفجارا كبيرا وطاقة هائلة أطلق عليها اسم (Big Bang)، وأخذت الجزيئات الأولى تتجمع بشكل إلكترونيات وبروتونات، ثم ظهر غاز الهيدروجين وغاز الهيليوم، فكان الكون، كما يزعمون، عبارة عن تجمعات من هذين الغازين، ثم أخذت هذه الغازات الساخنة تتجمع وتتكاثر بفعل الجاذبية مُشكِّلة ما يشبه الدخان وظهر منها النجوم والكواكب والأرض ونظامنا الشمسي.. إلخ!

Burrinta aragtida qaraxa wayn (Big Bang)

Aragtidan habowsan waxay leedahay: in adduunku ahaa wax ah sidi hal curiye oo curjisan, kadibna qarxay qarax wayn iyo awood aad u badan oo lagu magacaabay (Big Bang), kadibna unugyadii ugu horreeyay ayaa isu yimid ayaga oo qaab electronno iyo borotoonno ah, kadibna waxaa soo baxay gaaska haydrojiinka iyo gaaska hiliyuumka, kadibna adduunka ayaa ahaaday, sida ay sheegayaan, asiga oo ah qaabka kulanka labadaa gaas, kadibna gaasaskaas kulul ayaa billaabay in ay kulmaan oo isku curjismaan danabka awgiis oo sameeyay wax u eg haaw oo ay ka samaysmeen xiddigaha iyo meerayaasha iyo dhulka iyo nidaamkeenna qoraxda.

وهي مجرد نظرية لا يقبلها العقل السليم، لأنها لا ترقى للحقيقة العلمية التي لا تتغير عبر الزمان، وعرف النظرية الكثير من العلماء والباحثين، منهم الدكتور أمين جبر ضومط الأستاذ الزائر في دائرة الفيزياء في الجامعة الأمريكية في بيروت، الذي ذكر في الجزء الأول، صفحة 98، من كتابه "مرشد المعلمين في أصول تدريس العلوم": "والنظريات العلمية هي تعبير عما نتخيله بالحدس والتخمين والافتراض عن تلك الكائنات والأسباب الباطنة التي

لا يمكن مشاهدتها ... ولكن كثيرا من الافتراضات النظرية ليست لها تلك الدرجة من اليقين، ويعتبرها بعض المفكرين تخيلا بعيدا جدا عن الواقع مثل النظريات عن منشأ الكون ومصيره".

Waana aragti aanan caqliga toosani aqbali Karin, maxaa yeelay ma gaarayso xaqeeda cilmiga ah ee aan isbedelayn isdabayaalka taariikhda, aragtidaana waxay ku qeexen qaar badan oo culumada iyo aqoonyahannada ka mid ah, oo ay ka mid yihiin, Dr. Amiin Jabar Dumat oo barfasoor booqasho ku yimid ah qaybta fiisikiska ee jaamicadda Maraykanka ee Bayruut, kaas oo ku xusay juska koobaad, baalka 98 ee buuggiisa "Tusmada macalimiinta usuusha baridda culuumta": Nadariyadaha cilmiga ahna waa sheegidda waxyaabaha aan dareenka ku garanayno iyo malaha ee ku saabsan uunkaas iyo sababa qarsoon ee aanay suurtagalka ahayn in la arko... laakiin malayaasha qaar badan oo ka mid ah oo aragti ah malaha wax derjo hubaala ah, waxayna culumada qaar u haystaan male aad uga fog waaqica sida aragtiyada ku saabsan billowgii dunida iyo dhammaadkeeda.

ونرد على هذه النظرية بما يلي:

- 1- من أين أتت النجوم؟
- 2- من أين أتى الغبار؟
- 3- في الفيزياء يقولون: إذا كان هناك جسيمان (2 particles) وصار هناك تنافر (repulsion) لا يقتربان من بعضهما أكثر من مسافة معينة، ولا يصير انفجار، فكيف سيقتربان أكثر من هذا حتى يصير انفجار من قوة التنافر (repulsion)!
- 4- لو جئنا ببالون مليء بالغاز وانفجر، ماذا يحصل للغاز، هل يتجمع في مكان معين؟ لا بل ينتشر!

Aragtidaana waxaan uga jawaabaynaa:

1. Xaggee bay ka yimaadeen xiddigu?
2. Xaggee buu ka yimid haawgu?
3. Waxay dhahaan kuwa fiisikisku: haddii ay jiraan laba jirmi (2 particles) oo uu dhaco kala dudid (repulsion) isuma soo dhawaadaan labadaas wax ka badan in fogaan la ogyahay ah, wax qarax ahna ahaan mayaan, kolka sidee isugu soo dhawaadeen in intaa ka badan si qarax uga dhasho awooddii kala dudidda (repulsion)!
4. Haddii aan keenno buufin gaas ka buuxo ee uu qarxo, maxaa gaaska ku dhacaya? Ma meel buu ku kulmayaa? May, taa daaye wuuba fidayaa!

5- من نفس غيمة الغبار والغاز يخرج أشياء لها طبيعة متشابهة، ولكن الأرض لا تشبه الكواكب!!

وهذه النظرية مخالفة لقول الله تعالى: ﴿قُلْ أَنتُمْ لَتَكْفُرُونَ بِالَّذِي خَلَقَ الْأَرْضَ فِي يَوْمَيْنِ﴾ [فصلت:9]

فالآية تدلنا (على) أن أول ما خلقت الأرض في يومين ما كان للسماء وجود، لأن الله ذكر بعد ذلك في سياق الآيات خلق السماوات، فقال: ﴿فَقَضَاهُنَّ سَبْعَ سَمَاوَاتٍ فِي يَوْمَيْنِ﴾ [فصلت: 12]، أي غير اليومين الأولين الذين خلقت فيهما الأرض.

5. Isla bustaa daruurteeda iyo gaaska ayaa waxaa ka soo baxaya waxyaabo leh cimilooyin isu eg, hase ahaatee, dhulku uma eka meerayaasha!!
Aragtidanna waxay khilaafsantahay weedhii Eebbe kor ahaayee: ﴿Waxaad dhahdaa idinku ma waxaad ku kufrinaysaan kii uumay dhulka laba maalmood gudohood﴾[fusilat:9]. Kolka aayaddu waxay ina tusaysaa in markii ugu horreeyay ee dhulka la abuuray aanay samadu jirin, maxaa yeelay Eebbe ayaa markaa kadib isdabayaaalka aayadaha ku sheegay samooyinka uunkooda, kolkaas buu yiri: ﴿kolkaas buu ka dhigay toddoba samo laba maalmood gudahood﴾[fusilat:12], waana laba maalmood oo ka duwan kuwii dhulka lagu uumay gudahooda.

سقوط نظرية داروين

وهذه النظرية تدعي أن أصل الإنسان قرود، ثم تطور حتى صار إنسانا! وهذا كفر صريح.. لا يسلم به العاقل الرشيد.

وقد حكمت كل التقارير العلمية بسقوط هذه النظرية، بل نصت هذه التقارير على عدم إمكان حصول مثل هذا الأمر بيولوجيا، وقد أدين بالتزوير الخبير البريطاني لما يسمى علم الأجناس "أرثر كيث" الذي زعم اكتشافه لهيكل عظمي نصفه لإنسان ونصفه لقرود! إذ تبين أنه قام بتجميع العظام وإعادة ترتيبها! كما ذكرت جريدة "الشرق الأوسط" (عدد 4226 - الثلاثاء 19/8/1990م).

Dhicitankii aragtidii daarwin

Aragtidani waxay sheeganaysaa in aadanaha asalkiisu daanyeer ahaa, kadibna uu koray intii uu ka noqday dad! Waxana waa gaalnimo cad.. oo uusan qaadan karayn caqlilowga garaadka leh.

Waxaana cilmibaarisyadii oo dhan go'aamisay dhicitanka aragtidan, taa daaye, waxay cilmibaarisyadaasi caddeeyeen in aanay suurtagal ahayn in waxaas oo kale dhacaan cilmiga bayoolojiga haddii la raaco, waxaana lagu eedeeyay been abuur aqoonyahankii Ingiriiska ee waxa loo yaqaan cilmiga ajnaasta "Arther Kaith" kaas oo sheegtay in uu helay qolfoof lafo ah oo qaarkiis aadane yahay qaarka kalena daanyeer! Kolkaa ay caddaatay in uu isu keenay lafahas oo uu dib isugu aadiyay! Sida uu sheegay wargayska "al-sharq al-awsat" (tirsiga:4226 – Talaado 19/8/1990kii).

قال الله تعالى: ﴿لَقَدْ خَلَقْنَا الْإِنْسَانَ فِي أَحْسَنِ تَقْوِيمٍ﴾ [التين:4].
وقال الله عزّ وجلّ: ﴿وَعَلَّمَ آدَمَ الْأَسْمَاءَ كُلَّهَا﴾ [البقرة:31].

فآدم أبو البشر كان يتكلم اللغات ويصك النقود ويخيظ الثياب، ويبنى البيوت ويعرف تدبير أمر معيشتة.

Eebbe wuxuu yiri kor ahaayee: ﴿Waxaan u aburnay dadka qaab toosan﴾[at-Tiin:4].

Waxaa kale ee Eebbe yiri waynaayee oo kor ahaayee: ﴿Wuxuuna baray Aadam magacyada oo dhan﴾[al-Baqarah:31].

Kolka Aadam waa aabihii aadanaha wuxuu ku hadli jiray luqadaha wuxuuna tumi jiray lacagta dharkana wuu tolijiray, guryahana wuu dhisi jiray wuuna yaqiin sida uu noloshiisa arrimaha ku xiran u habaysto.

الدليل العقلي على وجود الله

العالم سمي عالما لأن كل ما فيه علامة على وجود الله، فالدليل العقلي على وجود الله هو أنه لا بد لكل صنعة من صانع، وكل فعل من فاعل، وكل بناء من بانٍ.. ومن باب أولى لا بد لهذا العالم بأسره من خالق خلقه وهو الله سبحانه وتعالى.

فالعالم ليس وليد مصادفة، وليس من خلق الطبيعة، ولم يخلق نفسه بنفسه، إنما الله أبرزه من العدم إلى الوجود بقدرته سبحانه.

Daliilka Caqliga ah ee Jiritaanka Eebbe

Caalamka waxaa lagu magacaabay caalam maxaa yeelay wax kasta oo ku dhex jira waxay calaamad u yihiin jiritaanka Eebbe, kolka daliilka caqliga ah ee jiritaanka Ilaahay waa in ay lagama maarmaan tahay in farsama kasta ay leedahay qof farsameeyay, fal kastana uu leeyahay mid falay, dhisma kastana leeyahay mid dhisay.. waxaaba kolka mudan oo lagama maarmaan ah in caalamkan uu leeyahay gabigiis abuure sameeyay kaas oo ah Eebbe nasahnaayee oo kor ahaayee.

Kolka caalamku maaha mid iskii isaga yimid, mana aha mid ay dabiicaddu abuurtay, asiguna isma abuurin, laakiin Eebbe ayaa ka soo saaray la'aan oo jiritaanka ugu soo saaray awooddiisa nasahnaayee.

محمدٌ ليسَ أوَّلُ المخلوقات

ومن المفاسد التي انتشرت بين بعض العوام، ما درج عليه بعض قراء المولد النبوي الشريف وبعض المؤذنين من قولهم: إن محمداً أوَّلُ المخلوقات، وما ذاك إلا لانتشار حديث جابر المكذوب بينهم: "أول ما خلق الله نور نبيك يا جابر".

وهذا الحديث لم يصححه أحد من الحفاظ، بل قال الحافظ السيوطي: "إنَّه لا يَثْبُتُ"

Muxammad maaha khalqiga kii ugu horreeyay

Waxaa ka mid ah khaladaadka qaar ku fiday caamada dexdooda, waxa ay caadada ka dhigteen kuwa mowliidka nabiga ee sharafta leh akhriya qaarkood iyo kuwa addima qaar ee ah oraaheedooda: Muxammad waa uunka kii ugu horreeyay, taasna wax kale maahe e', waxaa dhexdooda ku fiday xadiiska jaabir ee beenta ah ee ah "Wixii ugu horreeyay ee uu Eebbahaa uumay waa ilayska Nabigaaga jaabirow".

Xadiiskanna cid saxday oo xufaadda ka mid ah ma jirto, taa daaye, wuxuu yiri xaafidkii as-Sayuudi ahaa: "Wax sugan maaha".

ثم إن الذي يعتقد أن الله خلق نور محمد قبل كل الأشياء، لا يُكْفَرُ لکنه يُغَلَطُ، لمخالفته ثلاثة أحاديث ثابتة، وكذلك الذي يعتقد أن روح محمد خلق من نور لا يكفر، لكن من يعتقد أن جسد محمد خلق من نور فهو كافر لتكذيبه القرءان، قال الله تعالى: ﴿قُلْ إِنَّمَا أَنَا بَشَرٌ مِّثْلُكُمْ﴾ [الكهف: 110].

Intaa kadib, qofkii aaminsan in Eebbe uumay ilayska Muxammad waxyaabaha kale kahor oo dhan, la kufrin maayo wuuse khaldanyahay, maxaa wacay wuxuu khilaafay saddex xadiis oo saxiix ah oo sugan, waxaana sidaa oo kale ah qofkii aaminsan in ruuxa Muxammad laga abuuray ilays lana kufrin maayo, hase ahaatee, qofkii aaminsan Muxammad jirkiisa laga abuuray ilays waa kaafir quraanka uu beenshay awgiis, Eebbe waynaayee wuxuu yiri: ﴿Waxaad dhahdaa waxaan ahay bashar indinla mid ah﴾[al-kaHF:110].

قال البوصريُّ: [البيسط]

فَمَبْلَغُ الْعِلْمِ فِيهِ أَنَّهُ بَشَرٌ

وَأَنَّهُ خَيْرٌ خَلَقَ اللَّهُ كَلِمَهُمْ

فخیر لهؤلاء المؤذنین لو قالوا عَقِبَ الْأَذَانِ: الصلاة والسلام عليك يا خاتَمَ رُسُلِ اللَّهِ، بدل قولهم: الصلاة والسلام عليك يا أول خلق الله!

Wuxuu Buusiri yiri: [Gabay]:

Inta laga ognahay waa in, dad nabigu yahay

Iyo in uu khalqiga Ilaah oo dhan, ugu khayr badnaa.

Kolka waxaa loo qaatay kuwaa addimaya in ay dhahaan aadaanka kadib: Naxariis iyo nabadgelyo korkaaga ha ahaato, kii ugu dambeeyay rasuulladii Ilaahayow, intii ay dhihi lahaayeen: naxariis iyo nabadgelyo korkaaga ha ahaato khalqiga Eebbe kii ugu horreeyow.

وأما حديثُ: "كنت نبياً وءادم بين الروح والجسد"، فهو صحيح رواه أحمد في مسنده، ومعناه لا يدل على أوليته ﷺ بالنسبة لجميع المخلوقات، وإنما يدل على أن الرسول كان مشهوراً بوصف النبوة بين الملائكة في الوقت الذي لم يتمَّ تكوُّن جسد ءادم بدخول الروح فيه.

Laakiin xadiiska "Waxaan ahaa nabi ayada oo aadan ruuxa iyo jirka u dhaxeeyo" waa saxiix waxaa musnadkiisa ku soo weriyay Axmad, ujeeddadiisuna caddayn mayso horrayntiisa nabadgelyo iyo naxariisi korkiisa ha ahaatee uu ka horreeyo uunka oo dhan, hase ahaatee, wuxuu caddaynayaa, in Rasuulka loo aqoonsanaa nabinimo malaa'ikta dhexdeeda ayada oo aanay dhamaan uumista jirka Aadam oo aan naf la gelin.

محمد سبب وجود الدنيا

ورد في حديث صححه بعض الحفاظ وضعفه آخرون، أن الله تعالى قال لآدم: "لولا محمد ما خلقناك" رواه الحاكم وغيره، ومعناه خلقت الدنيا لأظهر محمداً صفوها أي أشرف الخلق، فيفهم من هذا أنه يصح أن يُقال: إن محمداً هو سبب وجود الدنيا، وهذا تشریف.

Muxammad ayaa sabab u ah jiritaanka dunida

Waxaa ku soo arooray xaddiis ay saxeen qaar ka mid ah culumada qaar kalena ay daciifsheen, in Eebbe kor ahaayee ku yiri Aadam: "Muxammad la'aantiis kuma abuureen" waxaa soo weriyay al-Xaakim iyo qaar kale, ujeeddadiisuna waa: waxaan dunida u uumay si aan u soo bandhigo Muxammad oo ah doorkeeda ama kii ugu sharaf badnaa uunka, marka waxaa taa laga garanayaa in ay bannaantahay in la yiraahdo: Muxamad ayaa sabab u ah jiritaanka dunida, taasina waa sharfid.

ابن تيمية والفلاسفة

لقد زاغ أحمد بن تيمية فقال بوجود المخلوق مع الله في الأزل، وقال إنه تحدث في ذات الله صفات، فتحدث له إرادة بعد إرادة، وكلام بعد كلام، والحق أن حدوث الصفات في الذات يوجب كون الموصوف حادثاً، ولقد كذب من قال في وصف ابن تيمية: إنه لسان المتكلمين على منهج السلف! وهو في الحقيقة مبتدع في الاعتقاد وفي الأحكام وقد خرق الإجماع في مسائل عديدة في الطلاق وغيره، كما قال الحافظ أبو زرعة العراقي.

Ibn Taymiyyah iyo Falaasifada

Waxaa hubaal ah in uu lumay Axmad bin Taymiyyah asiga oo yiri: in uu makhluuq la jiray Ilaahay asalakii hore, waxaa kele ee uu yiri: Ilaahay laftiisa waxaa ku dhacay sifooyin, kolkaas baa doonis (iraadooyin) ku dhacayaan iradooyin kale kadib, hadalna ka imaanayaa hadal kale kadib, xaqeeqaduna waa in haddii sifooyin ay nafta ku dhacaan ay ahaanayso (naftu) wax dhacdo ah, waxaana xaqeeqo ah in uu beensheegay qofkii yiri: in Ibn Taymiyyah yahay afahayeenkii mutakalimiinta manhajka salafka! Asiga oo dhab ahaantii ah bidci xagga caqiidada iyo xagga axkaanta wuxuuna jeexay ijmaaca masaa'il fara badan oo ku saabsan furriinka iyo waxyaabo kale, sida uu sheegay xaafidkii Abuu Zurcah ahaa ee ciraaqiga ahaa.

فمن اعتقد أن العالم أزلي لا بداية له، وأنه لم يزل موجودا مع الله بمادته وصورته، أو بمادته فقط، كابن تيمية فهو كافر. قال الزركشي في كتابه "تشنيف المسامع": "وهذا العالم بجملته علويّه وسفليّه، جواهره وأعراضه محدثٌ بمادته وصورته، كان عدما فصار وجودا، وعليه إجماع أهل الملل، ولم يخالف إلا الفلاسفة، ومنهم الفارابي وابن سينا، قالوا: "إنه قديم بمادته وصورته، وقيل قديم المادة محدث الصورة" ثم قال الزركشي: "وضلّهم المسلمون وكفروهم" انتهى، ويعني بذلك أن هذا كفرٌ بإجماع علماء الإسلام.

Qofkii rumaysta in caalamku soojireen yahay oo aanuu billow lahayn, oo uu Eebbe waligiis la jiray luddiisa iyo qaabkiisa ama luddiisa (curiyaashiisa) oo kaliya sida Ibn Taymiyah waa kaafir. Sarkashi wuxuu ku yiri kitaabkiisa "Tashniif al-Masaamic": Caalamkan dhammaantiis kiisa kore iyo kiisa hoose, jowhartiisa iyo muuqaalkiisu waa wax la sameeyay luddiisa iyo qaabkiisa, wuxuu ahaa la'aan kolkaas buu jiritaan noqday, waxaana isku raacsan umadaha oo dhan, cid khilaaftayna ma jirto oo aan falaasifada ahayn, waxaana ka mid ah Faaraabi iyo Ibn Siinaa, waxay dhaheen: "Waa soo jireen luddiisa iyo qaabkiisuba, waxaa kale oo la yiri: waa soo jireen luddiisu qaabkiisuna waa la sameeyay" kadibna wuxuu yiri: Sarkashi: "Waxaana lunsanaan ku xukumay muslimiinta oo kufriyeen" wuxuuna uga jeedaa, in waxani kufri yihiin oo culumada Islaamku isku raacsanyihiin.

الحكمة من خلق الجن والإنس

قال الله تعالى: ﴿وَمَا خَلَقْتُ الْجِنَّ وَالْإِنْسَ إِلَّا لِيَعْبُدُونِ. مَا أُرِيدُ مِنْهُمْ مِنْ رِزْقٍ وَمَا أُرِيدُ أَنْ يُطْعَمُونِ. إِنَّ اللَّهَ هُوَ الرَّزَّاقُ ذُو الْقُوَّةِ الْمَتِينُ﴾ [الذاريات: 56-58].

فإن الله لا تنفعه طاعات الطائعين، ولا يضره معاصي العاصين، فهو غني عن العالمين، وإنما جعل الله الدنيا اختبارا لهم وامتحانا، وهو أعلم بهم.

Xigmadda ku jirta uumidda Jinniga iyo Aadanaha

Wuxuu yiri Eebbe kor ahaayee: ﴿Uma abuurin jinniga iyo aadanaha wax aan in ay I caabudaan ahayn﴾[ad-daariyaad:56-58].

Kolka Eebbe wax ku dheefi maayo cibaadada addoomihiisa, dhibna u gaysan mayso caasinimada adoomihiisu, kolka asigu wuu ka deeqtoon yahay caalamka, wuxuuse adduunyada u uumay si uu addoomaha u jarribo oo u intixaano, asiga oo xaalkooda og.

العَرْشُ

هو سرير كبير، له أربعة قوائم، ليس كسيرينا، يحمله أربعة من الملائكة، وهو ثاني المخلوقات وجودا بعد الماء. قال الله تعالى: ﴿الرَّحْمَنُ عَلَى الْعَرْشِ اسْتَوَى﴾ [طه:5]. فسرها سيدنا علي بن أبي طالب رضي الله عنه بقوله: "إن الله خلق العرش إظهارا لقدرته، ولم يتخذهُ مكاناً لذاته"، كما رواه أبو منصور البغدادي في كتاب "الفرق بين الفرق".

Carshiga

Waa jiiibaar wayn oo afar lugood leh, maha sidi jiiibaarteenna, oo ay xambaarsanyihiin afar ka mid ah malaa'ikta, waana uunka kii labaad xagga jiritaanka biyaha kadib. Wuxuu yiri Eebbe kor ahaayee: ﴿(Eebbaha) Raxmaanka ahna Carshiga ayuu ku ekaaday﴾[Daha:5].

Wuxuu ku fasiray Sayyidinaa Cali bin Abii Daalib Eebbe ha ka raalli noqdee asiga oo yiri: "Ilaahay wuxuu carshiga u uumay in uu awooddiisa soo bandhigo, mana uusan ka dhigan meel uu dego" sida uu uga soo weriyay Abuu Mansuur al-Baqdaadi kitaabka "al-farq bayna al-firaq".

لماذا خُلِقَتِ السَّمَاوَاتُ وَالْأَرْضُ فِي سِتَّةِ أَيَّامٍ؟

قال الله عزَّ وجلَّ: ﴿وَلَقَدْ خَلَقْنَا السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضَ وَمَا بَيْنَهُمَا فِي سِتَّةِ أَيَّامٍ وَمَا مَسَّنَا مِنْ لُغُوبٍ﴾ [ق:38]، أي وما لَحِقْنَا مِنْ تَعَبٍ، لأن الذي يتعب هو الذي يعمل بالجراحة والأعضاء، أما الله فمتمِّزٌ عن مشابهة المخلوقات.

فإن قيل: لِمَ خَلَقَ اللهُ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضَ فِي سِتَّةِ أَيَّامٍ، ولم يخلقها في أقل من ذلك؟ فالجواب أن يقال: لِيُعَلِّمَنَا التَّائِيَّ فِي الْأُمُورِ.

Maxaa samooyinka iyo dhulka loo uumay lix maalmood gudahood?

Wuxuu yiri Eebbe waynaayee: ﴿Waxaanna uunnay samooyinka iyo dhulka iyo waxa ku dhex sagan lix maalmood namana taaban wax daal ah﴾[Qaaf:38].

Oo ah inama haleelin wax daal ah, maxaa yeelay kan daalaya waa midka ku shaqaynaya xubnaha iyo murqaha, Ilaahayse wuu ka nazahanyahay u ekaanshaha uunka.

Haddii la yiraahdo: Maxaa Eebbe u uumay samooyinka iyo dhulka lix maalmood gudahood, oo uusan u uumin maalmo intaa ka yar gudahood?
Jawaabtu waa in la yiraahdo: Waa si uu inoo baro kaadsi wax u qabadka.

أَوَّلُ الْأَنْبِيَاءِ

ءآدمُ عليه السلامُ هو أوَّلُ مخلوقٍ في ءآخرِ نوعِ خلقه اللهُ، وهو الجنسُ البشري، أي أنه أوَّلُ البشرِ وهو أوَّلُ نبيِّ بعثه اللهُ تعالى لتعليمِ أولادهِ دينِ الإسلامِ وكلمةُ "لا إلهَ إلا اللهُ".

Nabiyaasha kii ugu horreeyay

Aadam nabadgelyo korkiisa ha ahaatee ayaa ah uunkii ugu horreeyay jaadadkii ugu dambeeyay ee Eebbe uumay, oo ah jinsiga aadanaha, waana nabigii ugu horreeyay ee uu soo diray Eebbe kor ahaayee si uu carruurtiisa u baro diinta islaamka iyo kelimadda shahaadada.

فالأنبياء الذين بُدئوا بسيدنا ءآدمَ وخُتموا بسيدنا محمَّدَ الذي هو أفضلهم، مروراً بنوحٍ وإبراهيمَ وإسماعيلَ وإسحاقَ ويعقوبَ ويوسفَ وهارونَ وموسى وعيسى وغيرهم صلوات اللهُ وسلامه عليهم أجمعين، كلُّهم دعوا إلى توحيدِ اللهُ تعالى وإفرادهِ في العبودية، وكلهم إخوةٌ في الدين، عصمهم اللهُ من الكفر والمعاصي الكبائر، والمعاصي الصغائر التي فيها حسنةٌ ودناءةٌ نفس، قبل النبوةِ وبعدها، وجمَّلهم ربهم بالحلم والعلم والفهم والكرم والفظانة والفضيلة والصدق والعفة والشجاعة والأمانة ومكارم الأخلاق.

Kolka nabiyaasha lagu billaabay sayyidinaa Aadam ee lagu dhammeeyay sayyidinaa Muxammad oo ah kan ugu fadliga badan, ayada oo la soo marayo Nuux iyo Ibraahiim iyo Ismaaciil iyo Isxaaq iyo Yacquub iyo Yuusuf iyo Haaruun iyo Muuse iyo Ciise iyo kuwa kale nabadgelyadii Eebbe iyo naxariistiisii korkooda ha ahaatee, dhammaantood waxay dadka ugu yeereen towxiidka Eebbe kor ahaayee iyo in kaligiis la caabudo, dhammaantoodna walaalo ayay diinka ku yihiin, Eebbe ayaa ka megangelshay kufriga iyo dambiyada waawayn, iyo dambiyada yaryar ee keenaya akhlaaqxumada iyo dadnimaxunada, nabinimada kahor iyo kadibba, wuxuuna ku qurxiyay Eebbahood dulqaad iyo aqoon iyo fahmo iyo deeqsinimo iyo aqlilownimo iyo fadli iyo dhowrsanaan iyo geesinimo iyo aaminimo iyo akhlaaqda wanaagsan.

إلى أين المصير

قال الله تعالى: ﴿أَفَحَسِبْتُمْ أَنَّمَا خَلَقْنَاكُمْ عَبَثًا وَأَنَّكُمْ إِلَيْنَا لَا تُرْجَعُونَ﴾ [المؤمنون: 115]. وقال ربنا أيضا: ﴿ثُمَّ لِنُسْأَلُنَّ يَوْمَئِذٍ عَنِ النَّعِيمِ﴾ [التكاثر: 8].

فنعم العبد عبدٌ عامل بما يرضي الله، فإن الله أعد بفضله للمؤمنين المتقين جنة رغيدة، وبئس العبد عبدٌ معرض عن عبادة الله، فإن الله أعد بعدله للعاصين الظالمين نارا شديدة...

Xagee baa loo iilanayaa

Eebbe wuxuu yiri kor ahaayee: ﴿Miyaad u malayseen in aan idiin uunnay ciyaar oo aan xaggayaga la idiin soo celinayn﴾[al-Mu'minuun:115]. Wuxuu yiri Eebbaheen sidoo kale: ﴿Dabadeedna waxaa laydin waydiin maalintaas barwaaqadii﴾[at-Takaathur:8].

Kolka waxa wacan addoonka fala wixii Eebbe raalligelinaya, maxaa yeelay Eebbe wuxuu ugu sameeyay fadligiisa mu'iniinta cabsada janno barwaaqo ah, waxaana hoogay addoon ka jeestay cibaadada Eebbe, Eebbana wuxuu ugu sameeyay caddaaladdiisa kuwa ku caasiya ee dulmiga fala naar kulayl badan...

قال الله تعالى: ﴿تِلْكَ الدَّارُ الْآخِرَةُ نَجْعَلُهَا لِلَّذِينَ لَا يُرِيدُونَ عُلُوًّا فِي الْأَرْضِ وَلَا فَسَادًا وَالْعَاقِبَةُ لِلْمُتَّقِينَ﴾ [القصص: 83]، وقال: ﴿يُدْخِلُ مَنْ يَشَاءُ فِي رَحْمَتِهِ وَالظَّالِمِينَ أَعَدَّ لَهُمْ عَذَابًا أَلِيمًا﴾ [الإنسان: 31].

Wuxuu yiri Eebbe kor ahaayee: ﴿Taasi waa golihi aakhirro oo aan u yeelnay kuwa aan doonayn islasarraynta dhulka iyo fasaadda cidhibtana waxaa leh kuwa dhowrsada﴾[al-Qasas:83], wuxuuna yiri: ﴿Wuxuu gelshaa ciddii uu doono naxariistiisa kuwa dulmiga falana wuxuu u sameeyay cadaab xanuun badan﴾[al-Insaan:31].

كلُّ ما أتى به محمدٌ حقٌّ

قال الله سبحانه وتعالى: ﴿وَمَا آتَاكُمُ الرَّسُولُ فَخُذُوهُ وَمَا نَهَاكُمْ عَنْهُ فَانْتَهُوا وَاتَّقُوا اللَّهَ إِنَّ اللَّهَ شَدِيدُ الْعِقَابِ﴾ [الحشر: 7].

فيجب اعتقاد أن النبي ﷺ صادق في جميع ما أخبر به عن الله تعالى، سواء كان من أخبار الأمم والأنبياء وبدء الخلق، أو مما أخبر به مما يحدث في هذه الدنيا وفي الآخرة، أو من التحليل أو التحريم لبعض أفعال وأقوال العباد.

قال تعالى: ﴿وَمَا يَنْطِقُ عَنِ الْهَوَىٰ. إِنْ هُوَ إِلَّا وَحْيٌ يُوحَىٰ﴾ [النجم:3-4]. ومن جملة ما أخبرناهُ رسول الله عليه الصلاة والسلام:

Dhammaan wixii uu Muxammad la yimid waa xaq

Wuxuu yiri Eebbe Nasahnaayee oo kor ahaayee: ﴿Wuxuu Nabigu idiinla yimaado qaata wuxuu indinka reebayna kahara Eebbana ka baqa Eebbe way adagtahay ciqaabtiisue'﴾ [al-xashr:7].

Kolka waxaa waajib ah in la rumaysto in Nabigu nabadgelyo iyo naxariisi korkiisa ha ahaatee, uu run ka sheegay dhammaan wixii uu sheegay ee ay ka mid yihiin waxayaabaha ka dhex dhacaya adduunyadan iyo aakhiraba, ama wixii xaaraamayn ah ama xalaalayn ee falalka qaar iyo hadalka addoomaha.

Wuxuu yiri (Eebbe) kor ahaayee: ﴿Kuna hadli maayo hawo xaggeed. Wax aan waxyi loo waxyooday ahayna ma aha﴾[an-Najm:3-4]. Waxyaabaha uu Rasuulka Alle inoo sheegayna –nabadgelyo iyo naxariisi korkiisa ha ahaatrr – waxaa ka mid ah:

1 - عذاب القبر

يجب الإيمان بعذاب القبر، فالكافر المكلف الذي مات من غير توبة من كفره يعذب في قبره، فمن ذلك: عرض النار عليه كل يوم مرتين، مرة أول النهار ومرة آخره، وتضييق القبر عليه حتى تختلف أضلاعه، وضرب الملكين منكرٍ ونكيرٍ له بمطرقة من حديد بين أذنيه، وغير ذلك من العذاب. وكذلك بعض عصاة المسلمين الذين ماتوا من غير توبة يعذبون في قبورهم عذاباً أقل من عذاب الكفار، فيصيبهم مثلاً ضَعْفَةُ القبرِ والانزعاج من ظلمته ووحشته.

1. Cadaabta qabriga

Waxaa waajib ah in la rumeeyo cadaabta qabriga, qofka kaafirka ah ee qaangaarka ah ee towbad la'aan ku dhintay asiga oo kaafir ah waxaa lagu cadaabayaa qabrigiisa, waxaana ka mid ah (cadaabtaas): in naarta loo soo bandhigo maalinkasta laba jeer, mar gelinka hore marna gelinka dambe, iyo qabriga oo lagu cariirsho inta feerihisu isdhaafaan, iyo dilka ay labada malak Munkar iyo Nakiir dilayaan ayaga oo ku dhufanaya burris bir ah labadiisa dhegood dhexdooda, iyo waxyaabe kale oo cadaab ah. Sidoo kale qaar ka mid ah dambiilayaasha muslimiinta kuwaas oo dhintay ayaga oo aan towbad keenin waxaa lagu cadaabayaa qabrigooda cadaab ka yar cadaabta kufaarta, kolkaas baa tusaale ahaan waxaa ku dhacaya cariiriga qabriga iyo naxdinta mugdigiisa iyo cidladiisa.

ومن أنكر عذاب القبر كفر. قال تعالى: ﴿النَّارُ يُعْرَضُونَ عَلَيْهَا غُدُوًّا وَعَشِيًّا وَيَوْمَ تَقُومُ السَّاعَةُ أَدْخِلُوا آلَ فِرْعَوْنَ أَشَدَّ الْعَذَابِ﴾ [غافر:46].

Hadaba qofkii inkira cadaabta qabriga wuu kufriyay. Wuxuu yiri kor ahaayee (Eebbe): «Naarta ayaa loo bandhigaa subax iyo galabba, maalintay kacayso saacadduna (qiyaamada): gelsha reer fircown kan ugu daran cadaabka» [Gaafir:46]

وقال ﷺ "إنَّ العبدَ إذا وُضِعَ في قبره وتولَّى عنه أصحابه إنه ليسمع قرع نعالهم إذا انصرفوا أتاه ملكان فيقعدانه فيقولان: ما كنت تقول في هذا الرجل محمدٍ؟ فأما المؤمن فيقول: أشهد أنه عبدُ الله ورسولُه، فيقال له: انظر إلى مقعدك من النار أبدلك الله به مقعدا من الجنة، فيراهما جميعا. وأما الكافر أو المنافق فيقول: لا أدري كنت أقول ما يقول الناس فيه، فيقال: لا دريتَ ولا تليتَ، ثم يُضرب بِمِطْرَقَةٍ من حديد بين أذنيه، فيصيح صيحةً يسمعه من يليه إلا الثقلين" رواه البخاري ومسلم عن أنس عن النبي ﷺ.

Wuxuuna yiri: (Nabigu) Nabadgelyo iyo naxariisi korkiisa aha ahaatee: "Addoonka haddii la dhigo qabrigiisa dhexdiisa oo ay ka soo tagaan saaxiibadiis wuxuu maqlayaa dhawaaqa kabihisa, haddii ay ka soo tagaan waxaa u imaanaya laba malak kolkaas bay fariisinaan oo ku dhahayaan: Maxaad ka dhihi jirtay ninkan Muxamad? Kolka mu'minku wuxuu dhayaa: Waxaan ka markhaati ahay in uu addoonkii Ilaah yahay iyo rasuulkiisi, kolkaas baa lagu yiraahdaa: Fiiri fadhigii aad ku lahayd naarta wuxuu kuugu bedelay Eebbe fadhi jannada ah, kolkaas buu labadoobada arkayaa. Kaafirkuna ama munaafiqo wuxuu dhahayaa: garan maayo waxaan dhihi jiray waxa dadku ka leeyihiin, kolkaas baa lagu yiraahdaa: ha ogaanin oo ha akhrinin, kolkaas baa lagu dhuftaa burris bir ah labadiisa dhegood dhexdooda, kolkaas buu qaylshaa qaylo ay maqlayaan wixii ku dhaw inta aan jinni iyo insi ahayn" waxaa Anas oo Nabiga ka maqlay, nabadgelyo iyo naxariisi korkiisa ha ahaatee, ka soo weriyay Bukhaari iyo Muslim.

2- نعيم القبر

يجب الإيمان بنعيم القبر، فإن النبي ﷺ أخبر بذلك ومنه توسيع القبر سبعين ذراعاً في سبعين ذراعاً للمؤمن التقي ومن شاء الله له من غير الأتقياء كبعض الشهداء ممن نالوا الشهادة ولم يكونوا أتقياء، وتنويره بنور يشبه نور القمر ليلة البدر، وغير ذلك كشم رائحة الجنة.

Nicmada Qabriga

Waxaa waajib ah in la rumeeyo nicmada qabriga, maxaa wacay nabigu nabadgelyo iyo naxariisi korkiisa ha ahaatee, ayaa sheegay, waxaana ka mid ah qabriga u

ballaariintiisa toddobaatan dhudhun oo lagu dhuftay toddobaatan dhudhun qofka mu'minka ah ee cabsada iyo qofkii uu Eebbe la doono ee aan ahayn kuwa Alla kacabsiga badan sida qaar ka mid ah shahiidyada ee shahaadada helay laakiin aan ahayn kuwa Alla kacabsi badan, iyo (qabriga) iftiimintiisa lagu iftiiminayo ilays u eg kan dayaxa habeenka uu dhanyahay, iyo waxyaabo kale sida urinta carafta jannada.

قال ﷺ: "إِذَا قُبِرَ الْمَيِّتُ أَوْ الْإِنْسَانُ أَتَاهُ مَلَكَانِ أَسْوَدَانِ أَزْرَقَانِ، يُقَالُ لِأَحَدِهِمَا: مُنْكَرٌ، وَلِلْآخَرَ نَكِيرٌ، فَيَقُولَانِ لَهُ: مَا كُنْتَ تَقُولُ فِي هَذَا الرَّجُلِ مُحَمَّدٍ؟ فَهُوَ قَائِلٌ مَا كَانَ يَقُولُ، فَإِنْ كَانَ مُؤْمِنًا قَالَ: هُوَ عَبْدُ اللَّهِ وَرَسُولُهُ، أَشْهَدُ أَنْ لَا إِلَهَ إِلَّا اللَّهُ وَأَشْهَدُ أَنَّ مُحَمَّدًا عَبْدُهُ وَرَسُولُهُ، فَيَقُولَانِ لَهُ: إِنْ كُنَّا لَنَعْلَمُ أَنَّكَ لَتَقُولُ ذَلِكَ، ثُمَّ يُفْسَحُ لَهُ فِي قَبْرِهِ سَبْعُونَ ذِرَاعًا فِي سَبْعِينَ ذِرَاعًا، وَيُنَوَّرُ لَهُ فِيهِ، فَيُقَالُ لَهُ: نَمَّ، فَيَنَامُ كَنَوْمِ الْعُرُوسِ الَّذِي لَا يُوقِظُهُ إِلَّا أَحَبُّ أَهْلِهِ، حَتَّى يَبْعَثَهُ اللَّهُ مِنْ مَضْجَعِهِ ذَلِكَ" رواه ابن حبان.

Wuxuuna yiri: (Nabigu) Nabadgelyo iyo naxariisi korkiisa aha ahaatee: "Haddii la duugo maydka ama dadka waxaa u yimaada laba malak oo madow oo boor ah, midkood waxaa la yiraahdaa Munkar, kan kalena Nakiir, kolkaas bay ku dhahaan: Maxaad ka dhihi jirtay ninkan Muxamad? Kolkaas buu dhahaa wixii uu dhihi jiray. Haddii uu mu'min ahaa wuxuu dhayaa: Waa addoonkii Ilaah iyo Rasuulkiisii, Waxaan ka markhaati ahay in uu addoonkii Ilaah yahay iyo rasuulkiisi, waxaan ka markhaati ahay in aan ilaah kale jirin Eebbe mooyee, waxaa kale oo aan ka markhaati ahay in Muxamad addoonkii Ilaah iyo Rasuulkiisi yahay, kolkaas bay ku dhahaan: Waan ogayn in aad sidaa dhahayso, kolkaas baa qabrigiisa loo ballaariyaa toddobaatan dhudhun, oo loo nuurshaa dhexdiisa, oo lagu yiraahdaa: hurud, kolkaas buu hurdaa, sida hurdada (qofka) arooska ah oo aanay toosinayn ciddiisa kuwa ugu jecel wax aan ahayn, inta uu Eebbe ka soo baxsho jifkiisaa." Waxaa soo weriyay Ibn Xibbaan.

3- سؤال الملكين منكرٍ ونكيرٍ

يجب الإيمان بسؤال الملكين منكرٍ ونكيرٍ، وهو يحصل للمؤمن والكافر. ثمَّ المؤمن الكامل لا يلحقه فرع ولا انزعاج من سؤالهما، لأن الله يثبت قلبه فلا يرتاع من منظرهما المخيف، لأنهما كما جاء في الحديث أسودان أزرقان، ويستثنى من السؤال الأنبياء والطفل والشهيد، والمراد بالطفل من مات دون البلوغ، وبالشاهد شهيد المعركة.

3- Suaasha labada malak Munkar iyo nakiir

Waxaa waajib ah in la rumeeyo su'aasha labada malak Munkar iyo Nakiir, waxaana la waydiinayaa muslimka iyo kaafirkaba. Kadibna mu'minka dhamaystiran haleelimaydo cabsida iyo dhibaataada su'aashoodu, maxaa yeelay Eebbe ayaa qalbigiisa sugaya matka ka nixi maayo araggooda cabsida leh, maxaa yeelay sidii ku

soo aroortay xaddiiska waa madowyihiin oo booranyihiin, waxaanna marayn su'aashaa nabiyaaalka iyo carruurta iyo shahiidyada, waxaana carruurta looga jeedaa gofkii dhinta inta uusan qaangaarin, shahiidkuna waa kan goobta dagaalka.

4- البعث

هو خروج الموتى من القبور بعد إعادة الجسد الذي أكله التراب، إن كان من الأجساد التي يأكلها التراب، وهي أجساد غير الأنبياء وشهداء المعركة، وكذلك بعض الأولياء لا يأكل التراب أجسادهم. قال تعالى: ﴿وَأَنَّ السَّاعَةَ آتِيَةٌ لَا رَيْبَ فِيهَا وَأَنَّ اللَّهَ يَبْعَثُ مَنْ فِي الْقُبُورِ﴾ [الحج:7].

4- Soobixinta (Bacthiga)

Waa dadka dhintay oo qabuuraaha ka soo baxa kadib markii la soo celshay jirkii ay carradu cuntay, haddii uu ka mid ahaa jirka ay carradu cunayso, waana jirka inta aan nabiyada ahayn iyo shahiidyada dagaalka, iyo sidookale qaar awliyada ka mid ah jirkooda carradu cunimayso. Wuxuu yiri: (Eebbe) kor ahaayee: ﴿Saacadduna way iman shaki la'aan Eebbana wuu soo bixin kuwa qabuuraaha ku jira﴾ [al-Xaj:7].

5- الحشر

هو سوقٌ من يخرج من القبور إلى الموقف، والناس في الحشر يكونون على ثلاثة أحوال، فقسم منهم كاسون راكبون طاعمون وهم الأتقياء، وقسم حفاة عراة وهم الفاسقون، وقسم حفاة عراة يُجرؤون على وجوههم وهم الكفار، فالإنس يُحشرون وكذلك الجنُّ والوحوشُ. قال تعالى: ﴿وَأَتَقُوا اللَّهَ وَاعْلَمُوا أَنَّكُمْ إِلَيْهِ تُحْشَرُونَ﴾ [البقرة:203].

5- Kulanka

Waa soo kaxaynta dadka qabuuraaha ka soo baxaya looso kexaynayo meesha lagu kulmayo, dadkuna kulanka maka la tago waxay ahaanayaan saddex qaybood, qayb ka mid ah dhar bay xiranyihiin wayna fuushanyihiin wayna dherganyihiin waana kuwa Eebbe kacabsiga badan, qaarna way kabala'yihiin oo qaawanyihiin waana faasiqiinta, qaarna waa qaawanyihiin kolkaas baa foolka ayaga oo dhulka ku haya la jiidayaa waana kufaarta, kolka dadka waa la kulminayaa jinninga iyo xooluhuna sidoo kale. Wuxuu yiri: (Eebbe) kor ahaayee: ﴿Kana cabsada Eebbe ogaadana in adinka xaggiisa la idiin soo kulminaayo﴾ [al-Baqarah:203].

6- القيامة

القيامة أولها من خروج الناس من قبورهم إلى استقرار أهل الجنة في الجنة وأهل النار في النار، ومقدار القيامة خمسون ألف سنة مما نعد.

قال تعالى: ﴿فِي يَوْمٍ كَانَ مِقْدَارُهُ خَمْسِينَ أَلْفَ سَنَةٍ﴾ [المعارج:4]

6- Qiyaamaha

Qiyaamaha billowgiisu waa dadku kolka ay qubuuraaha ka soo baxaan inta ay ahlu jannadu jannada dhexdeeda ku sugnaanayaan halu naarkuna naarta dhexdeeda,

qiyaamaha dhererkeeduna waa kontonkun oo sano oo kuwa aan tirinayno la mid ah. Wuxuu yiri: (Eebbe) kor ahaayee: ﴿maalin dhererkeedu yahay konton kun oo sano﴾[al-Macaarij:4].

7- الحساب

هو عَرْضُ أعمال العباد عليهم وتوقيفهم عليها بعد أخذهم كتبهم، فأما المؤمن فيأخذ كتابه بيمينه، وأما الكافر فيأخذ كتابه بشماله من وراء ظهره.

وهذا الكتاب هو الكتاب الذي كتبه الملكان رقيب وعتيد في الدنيا، قال تعالى: ﴿فَأَمَّا مَنْ أُوتِيَ كِتَابَهُ بِيَمِينِهِ﴾ (7) ﴿فَسَوْفَ يُحَاسَبُ حِسَابًا يَسِيرًا﴾ (8) ﴿وَيَنْقَلِبُ إِلَىٰ أَهْلِهِ مَسْرُورًا﴾ (9) ﴿وَأَمَّا مَنْ أُوتِيَ كِتَابَهُ وَرَاءَ ظَهْرِهِ﴾ (10) ﴿فَسَوْفَ يَدْعُو ثُبُورًا﴾ (11) وَيَصَلِّي سَعِيرًا﴾ [الانشقاق:7-12].

7- Xisaabta

Waa soo bandhigidda addoomuhu wixii ay faleen iyo tusiddooda kadib markii ay qaateen kutubtoodii, kan mu'minka ahi wuxuu kitaabkiisa ku qaadanayaa midigtiisa, kaafirkuna wuxuu kitaabkiisa ku qaadanayaa bidixdiisa ayada oo laga siinayo.

Kitaabkanina waa kitaabkii ay qoreen labada malak Raqiib iyo Catiit intii dunida la joogay, Wuxuu yiri (Eebbe) Kor ahaayee: ﴿Qofkiise kitaabkiisa midigta laga siiyay. Waxaa la xisaabin doonaa xisaab fudud. Wuxuuna u noqon doonaa reerkiisi asiga oo faraxsan. Qofkiise kitaabkiisa laga siiyay gadaashiisa. Wuxuu ku cataabi doonaa hoog. Wuxuuna lagu gubi doonaa (naarta) Saciir﴾[al-inshiqaaq:7-12].

8- الثواب والعقاب

الثواب هو الجزاء الذي يجازاه المؤمن في الآخرة مما يسره، وأما العذاب فهو ما يسوء العبد ذلك اليوم من دخول النار وما دون ذلك.

8- Abaalmarinta iyo Ciqaabta

Abaalmarintu waa abaalgudka loogu abaalgudayo mu'minka aakhirada wax ka farxinaya, cadaabkuna waa waxa xumaynaya addoonka maalintaas ee ah gelidda naarta iyo wixii la xiriira.

9- الميزان

الميزان هو ما يوزن عليه الأعمال، قال تعالى: ﴿وَالْوِزْنُ يُوَمَّعِدُ الْحَقُّ فَمَنْ ثَقُلَتْ مَوَازِينُهُ فَأُولَٰئِكَ هُمُ الْمُفْلِحُونَ﴾ [الأعراف:8].

9- Miisaanka

Miisaanku waa waxa lagu miisaamayo falalka, wuxuu yiri (Eebbe) kor ahaayee: ﴿Miisaankuna maalintaas waa xaq qofkiise ay culusaado miisaankiisu kuwaasi waaye kuwa liibaanay﴾[al-Acraaf:8].

فالكافر ليس له حسنات يوم القيامة، إنما توضع سيئاته في كِفَّةٍ من الكِفَّتَيْنِ، وأما المؤمن فتوضع حسناته في كِفَّةٍ وسيئاته في الكِفَّةِ الأخرى، فإن رجحت حسناته على سيئاته يدخل الجنة من غير عذاب، وإن رجحت سيئاته فهو تحت مشيئة الله، إن شاء عفا عنه وإن شاء عذبه ثم أدخله الجنة بعد ذلك. قال تعالى: ﴿فَأَمَّا مَنْ ثَقُلَتْ مَوَازِينُهُ ﴿6﴾ فَهُوَ فِي عِيشَةٍ رَاضِيَةٍ ﴿7﴾ وَأَمَّا مَنْ خَفَّتْ مَوَازِينُهُ ﴿8﴾ فَأُمُّهُ هَاوِيَةٌ﴾ [القارعة: 6-9].

Kolka kaafirku malaha xasanaad maalinta qiyaamaha ee waxaa la dhigayaa dambiyadiisa dhinac ka mid ah miisaanka labadiisa dhinac, mu'minkana waxaa la dhigaa xasanaadkiisa dhinac xumaantiisana dhinaca kale, haddii ay kolkaa ka badato xasanaadkiisu xumaantiisa wuxuu gala jannada cadaab la'aan, haddii xumaantiisu badnaato Eebbe ayaa sidii uu doono yeelaya, haddii uu doono wuu u cafin haddii uu doonana wuu cadaabi, kadibna jannada ayuu gelin. Wuxuu yiri (Eebbe) Kor ahaayee: **Qofkiise uu culusaado miisaankiisu. Wuxuu gala nolol uu u bego. Qofkiise miisaankiisu fududaado. Hooyadiis waa (Naarta) Haawiyo** [al-Qaaricah:6-9].

10- النَّارُ

النَّارُ أَي جَهَنَّمَ مَخْلُوقَةٌ الْآنَ، قَالَ تَعَالَى: ﴿فَاتَّقُوا النَّارَ الَّتِي وَقُودُهَا النَّاسُ وَالْحِجَارَةُ أُعِدَّتْ لِلْكَافِرِينَ﴾ [البقرة: 24]، وَهِيَ أَقْوَى وَأَشَدُّ نَارَ خَلَقَهَا اللَّهُ، وَمَرْكَزُهَا تَحْتَ الْأَرْضِ السَّابِعَةِ، وَهِيَ بَاقِيَةٌ إِلَى مَا لَا نِهَآيَةَ لَهُ، قَالَ تَعَالَى: ﴿إِنَّ اللَّهَ لَعَنَ الْكَافِرِينَ وَأَعَدَّ لَهُمْ سَعِيرًا﴾ ﴿64﴾ خَالِدِينَ فِيهَا أَبَدًا لَّا يَجِدُونَ وَلِيًّا وَلَا نَصِيرًا﴾ [الأحزاب: 64-65].

10- Naarta

Naarta oo ah jahannamo way uumantahay hadda, wuxuu yiri (Eebbe) Kor ahaayee: **Ka baqa naarta taas oo shidaalkeedu yahay dadka iyo dhagaxyada oo gaalada loo sameeyay** [al-baqarah:24], waana midda ugu xoogga badan oo ugu daran intii Eebbe naar abuuray, degaankeeduna waa dhulka toddobaad hoostiisa, waxayna jiraysaa waligeed dhammaad la'aan, Wuxuu yiri (Eebbe) Kor ahaayee: **Eebbe wuu fogeeyay gaalada wuxuuna u sameeyay saciiro. Ayaga oo ku waaraya dhexdeeda waligood oo aan helayn gargaare iyo mid kaalmeeya** [al-axsaab:64-65]

11- الصَّرَاطُ

الصَّرَاطُ جَسْرٌ يُمَدُّ عَلَى ظَهْرِ جَهَنَّمَ يَرُدُّهُ النَّاسُ، أَحَدُ طَرَفَيْهِ فِي الْأَرْضِ الْمُبَدَّلَةِ، وَالطَّرَفُ الْآخَرُ فِيمَا يَلِي الْجَنَّةَ بَعْدَ النَّارِ، فَيَمُرُّ النَّاسُ فِيمَا يَحَازِي الصَّرَاطَ. وَالْمُؤْمِنُونَ

حينئذٍ قسمٌ منهم لا يدوسون الصراط، إنما يمرُّون في هوائه طائرِين، ومنهم من يدوسونه، ثمَّ هؤلاء قسمٌ منهم يُوقعون فيها، وقسمٌ يُنجيهم الله فيخلصون منها.

11- Siraadka (Jidka)

Siraadku waa jid "buundo" ah oo maraya Jahannamo korkeeda oo dadku marayo, darfihiisa mid ka mid ah wuxuu jiraa dhulkii la bedelay, darafta kalena dhinaca jannada xigta naarta kadib, kolkaas baa dadku soo marayaa dhinaca jidkaas. Mu'iniintuna markaas qaar ka mid ah ku joogsan maayaan jidkaas, waxaase ka mid ah qaar ku joogsanaya, qaar kuwaa ka mid ahna waa lagu dhex ridayaa, qaarna Eebbe ayaa ka badbaadinaya kolkaas bay ka gudbayaan.

وأما الكُفَّارُ فكلهم يتساقطون فيها، قال تعالى: ﴿وَإِنْ مِنْكُمْ إِلَّا وَارِدُهَا﴾ [مریم:71]، وليس المعنى أن كلَّ الناس يدخلون النَّارَ، والورود نوعان: ورود مرور في هوائها، وورود دخول.

Gaaladuna dhammaantood way ku dhacayaan, wuxuu yiri (Eebbe) Kor ahaayee: ﴿Qof kasta oo idinka mid ah wuu soo marayaa﴾ [Maryam:71].

12- الْحَوْضُ

الحوضُ مكانٌ أعدَّ اللهُ فيه شراباً لأهل الجنة، يشربون منه قبل دخولهم الجنة فلا يصيبهم بعد ذلك ظمأً، ولكلِّ نبيٍّ من أنبياء الله حوضٌ تشرب منه أمته، وأكبر الأحواض هو حوض نبيِّنا ﷺ، وعليه أكوابٌ بعدد نجوم السماء، وينصبُ فيه من ماء الجنة.

12. Xawdka (Harada)

Xawdku waa meel uu ugu sameeyay Eebbe dhexdiisa cabitaan dadka reera jannada ah, oo ay ka cabayaan inta aysan jannada gelin kaas oo aanay kadib oomayn, nabi kasta oo nabiyaada Eebbe ka mid ahna xowd ayuu leeyahay ay ummaddiisu ka cabayso, xowdka ugu waynna waa xowdka nabigeenna nabadgelyo iyo naxariisi korkiisa ha ahaatee, waxaana dushiisa yaalla koobab tiradoodu gaarayso tirada xidigaha cirka, waxaana laga waraabinayaa biyaha jannada.

13- الشِّفَاعَةُ

الشِّفَاعَةُ هي طلب الخير من الغير للغير، والشِّفَاعَةُ تكون للمسلمين فقط، فالأنبياء يشفعون وكذلك العلماء العاملون والشهداء والملائكة.

13- Shafaacada

Shafaacadu waa in khayr loowaydiiyo qof cid kale, shafaacadana waxaa leh muslimiinta oo kaliya, kolka nabiyaaashu way shafeecayaan, culumada wanaagsanna waa sidoo kale, iyo shahiidyada iyo malaa'ikta.

قال رسول الله ﷺ: "شفاعتي لأهل الكبائر من أمي" رواه الحاكم وصححه. فلا شفاعاة للكفار يوم القيامة، قال تعالى: ﴿يَعْلَمُ مَا بَيْنَ أَيْدِيهِمْ وَمَا خَلْفَهُمْ وَلَا يَشْفَعُونَ إِلَّا لِمَنْ ارْتَضَىٰ وَهُمْ مِنْ خَشِيَّتِهِ مُشْفِقُونَ﴾ [الأنبياء:28]

Wuxuu yiri Nabigu nabadgelyo iyo naxariisi korkiisa ha ahaatee: "Shafeecadayda waxaay u sugnaatay dadka dambiyada waawayn fala ee umaddayda ka mid ah" waxaa soo weriyay Xaakim oo saxay. Kolka gaaladu shafeeco malaha maalinta qiyaamaha, wuxuu yiri (Eebbe) Kor ahaayee: ﴿Wuxuu ogyahay waxa hortooda ah iyo waxa gadaashooda ah una shafeeca qaadi maayaan cid aan ahayn kuwa uu ka raalli yahay ayaga oo cabsidiisa ka naxaya﴾[al-Anbiyaa':28].

14 - الجنة

هي دار السلام، وهي مخلوقة الآن، قال تعالى: ﴿وَسَارِعُوا إِلَىٰ مَغْفِرَةٍ مِّن رَّبِّكُمْ وَجَنَّةٍ عَرْضُهَا السَّمَاوَاتُ وَالْأَرْضُ أُعِدَّتْ لِلْمُتَّقِينَ﴾ [آل عمران: 133]. وأكثر أهلها من الفقراء، قال النبي ﷺ: "أطلعت في الجنة فرأيت أكثر أهلها الفقراء" رواه البخاري ومسلم.

14- Jannada

Waa guriga nabadda, wayna abuurantahay hadda, wuxuu yiri (Eebbe) kor ahaayee: ﴿Udhaqsada dambidhaaf Eebbe xaggiis ka ahaaday iyo janno ballarkeedu yahay samooyinka iyo dhulka oo loo sameeyay kuwa dhowrsada﴾[ali-Cimraan:133]. Dadkeedana waxaa u badan saboolka, wuxuu yiri Nabigu nabadgelyo iyo naxariisi korkiisa ha ahaatee:"Waxaan eegay jannada dhexdeeda kolkaas baan arkay in dadkeeda kuwa ugu badani yihiin kuwa saboolka ah" waxaa soo weriyay Bukhaari iyo Muslim.

وقال رسول الله ﷺ: "قال الله عز وجل: أعددتُ لعبادي الصالحين ما لا عين رأت ولا أذن سمعت ولا خطر على قلب بشر" رواه البخاري.

Waxaa kale ee uu yiri Nabigu nabadgelyo iyo naxariisi korkiisa ha ahaatee: "Wuxuu yiri Eebbe waynaayee oo kor ahaayee: Waxaan u sameeyay addoomahayga suubban wax aan ili arag dhegina maqal aadani uurkiisna aan ku soo dhicin" waxaa soo weriyay Bukhaari.

رحمة الله في الدنيا والآخرة

إن رحمة ربنا في الدنيا شاملة، فهو يرحم المؤمنين والكافرين، أما في الآخرة فرحمته خاصة للمؤمنين، قال الله تعالى: ﴿وَرَحْمَتِي وَسِعَتْ كُلَّ شَيْءٍ فَسَأَكْتُبُهَا لِلَّذِينَ

يَتَّقُونَ ﴿[الأعراف:156]، أي وسعت في الدنيا كل مسلم وكافر، قال: ﴿فَسَاءَ كُتِبَ عَلَيْهَا﴾ أي في الآخرة، ﴿لِلَّذِينَ يَتَّقُونَ﴾ أي أحصاها لمن اتقى الشرك وسائر أنواع الكفر.

Naxariista Eebbe Adduun iyo Aakhiro

Naxariista Eebbe inta dunida la joogo way gaaraysaa cidwalba, kolka wuu u naxariisanayaa mu'miniinta iyo gaalada, hase ahaatee aakhiro naxariistiisu waxay u gaar tahay mu'miniinta, wuxuu yiri Eebbe kor ahaayee: ﴿Naxariistaydu waxay kaartay wax kasta waxaanna u qorayaa kuwa dhowrsanaya﴾[al-Acraaf:156]. Ujeeddadu waa in ay gaarayso inta adduunka la joogo muslim iyo gaal intaba, wuxuu yiri: "waxaanse u qorayaa" oo ah aakhiro dhexdeeda, "kuwa dhowrsanaya" oo ah in uu u gaar yeelayo ciddii ka dhowrsata shirkiga iyo jaadadka kale ee kufriga.

وقال تعالى: ﴿وَنَادَى أَصْحَابُ النَّارِ أَصْحَابَ الْجَنَّةِ أَنْ أَفِيضُوا عَلَيْنَا مِنَ الْمَاءِ أَوْ مِمَّا رَزَقَكُمُ اللَّهُ قَالُوا إِنَّ اللَّهَ حَرَّمَهُمَا عَلَى الْكَافِرِينَ﴾ [الأعراف:50]، أي أن الله حرم على الكافرين الرزق النافع والماء المروي في الآخرة، وذلك لأنهم أضاعوا أعظم حقوق الله الذي لا بديل له، وهو الإيمان بالله ورسوله.

Wuxuu yiri (Eebbe) kor ahaayee: ﴿Way u yeereen reera naareedki reera jannadii: in aad ku soo shubtaan korkeenna biyaha qaar ama waxa Eebbe idinku dheefshay qaar, waxay dhaheen Eebbe wuu ka xaaraameeyay gaalada﴾[al-Acraaf:50]. Ujeedaduna waa in Eebbe ka xaaraameeyay gaalada dheefta wanaagsan iyo biyaha oonbeelka leh aakhira dhexdeeda, taasina waa in ay lunsheen wixii ugu waynaa xaquuda Ilaahay kaas oo aan wax lagu doorshaahi jirin, waana iimaanka Eebbe iyo Nabigiisa.

ثم إن الله جعل الدخول في الإسلام الذي هو أفضل نعم الله سهلا، وذلك بالنطق بالشهادتين بعد معرفة الله ورسوله.

Intaa kadib Eebbe wuxuu ka dhigay soo gelitaanka islaamka oo nicmooyinka Eebbe kan ugu wanaagsan mid fudud, kaas oo ah in lagu dhawaaqo labada shahaado kadib marka la aqoonsado Eebbe iyo Nabigiisa.

وجعل الكفر سهلا، فكلمة واحدة تدل على الاستخفاف بالله أو شريعته، تخرج قائلها من الإيمان وتوقعه في الكفر الذي هو أسوأ الأحوال، حتى يكون عند الله أحقر من الحشرات والوحوش، وسواء تكلم بها جاداً أو مازحاً أو غاضباً.

Waxaa kale oo uu fududeeyay gaalnimada, kolka weedh kaliya oo tusaysa liididda Eebbe ama shareecadiisa ayaa ka bixinaysa qofkii ku dhawaaqa iimaanka kuna ridaysa gaalnimada kaas oo ah waxyaabaha oo dhan kan ugu xun, inta uu ka noqdo Eebbe agtiis wax ka liita cayayaanka iyo dugaagga, waana isku mid ama ha ku hadlo asiga oo u kasaya ama kaftamaya ama cadhaysan.

وقد شُرح ذلك في كتب الفقه في المذاهب المعتبرة، وحكموا أن المتلفظ بها يكفر.
 قال الله تبارك وتعالى: ﴿وَلَقَدْ قَالُوا كَلِمَةَ الْكُفْرِ وَكَفَرُوا بَعْدَ إِسْلَامِهِمْ﴾ [التوبة:74].
 وقال الله تعالى: ﴿إِنَّ شَرَّ الدَّوَابِّ عِنْدَ اللَّهِ الَّذِينَ كَفَرُوا فَهُمْ لَا يُؤْمِنُونَ﴾
 [الأنفال:55].

والدوابُّ في الآية كلُّ ما يمشي على وجه الأرض من إنسان وبهائم وحشرات.

Waxaana lagu sharxay arrinkaas kutubta fiqhiga ee madaahibta la aqoonsanyahay, waxayna xugmiyeen in ku dhawaaqiddeedu ay kufri tahay. Wuxuu yiri Eebbe Nasahnaayee oo kor ahaayee: **﴿Dhab ahaan waxay dhaheen weedhii kufriga wayna kufriyeen kadib islaamnimadoodi﴾** [at-tawbah:74].

Waxaa kale oo uu yiri Eebbe kor ahaayee: **﴿Noolaha waxaa ugu shar badan Ilaahay agtiisa kuwa kufriyay mana ay rumaunayaan﴾**[al-Anfaal:55].

Noolaha aayadda lagu sheegayna waa wax kasta oo ku socda dhulka dushiisa ee ah dad ama xoolo ama cayayaan.

الكفر أكبر الذنوب وأقبح الشرور

قال الله عزَّ وجلَّ: ﴿يَوْمَئِذٍ تُعْرَضُونَ لَا تَخْفَى مِنْكُمْ خَافِيَةٌ. فَأَمَّا مَنْ أُوتِيَ كِتَابَهُ بِيَمِينِهِ فَيَقُولُ هَؤُلَاءِ أَقْرَبُوا كِتَابِيَةَ. إِنِّي ظَنَنْتُ أَنِّي مُلَاقٍ حِسَابِيَةَ. فَهُوَ فِي عِيشَةٍ رَاضِيَةٍ. فِي جَنَّةٍ عَالِيَةٍ قُطُوفُهَا دَانِيَةٌ. كُلُوا وَاشْرَبُوا هَنِيئًا بِمَا أَسْلَفْتُمْ فِي الْأَيَّامِ الْخَالِيَةِ. وَأَمَّا مَنْ أُوتِيَ كِتَابَهُ بِشِمَالِهِ فَيَقُولُ يَا لَيْتَنِي لَمْ أُوتَ كِتَابِيَةَ. وَلَمْ أَدْر مَا حِسَابِيَةَ. يَا لَيْتَهَا كَانَتِ الْقَاضِيَةَ. مَا أَغْنَى عَنِّي مَالِيَهُ. هَلَكَ عَنِّي سُلْطَانِيَتُهُ. خُذُوهُ فَغُلُّوهُ. ثُمَّ الْجَحِيمَ صَلُّوهُ. ثُمَّ فِي سِلْسِلَةٍ ذَرْعُهَا سَبْعُونَ ذِرَاعًا فَاسْلُكُوهُ. إِنَّهُ كَانَ لَا يُؤْمِنُ بِاللَّهِ الْعَظِيمِ﴾
 [الحاقة:18-33].

Kufriгу waa dambiyada kan ugu wayn oo ugu xun sharta

Wuxuu yiri Eebbe waynaayee oo kor ahaayee: **﴿Maalinkaas ayaa laydin soo bandhigi mana qarsoomayaan qaar idinka mid ah. Qofkiisa kitaabkiisa laga siiyay midigtiisa wuxuu dhihi kaalooy akhriya kitaabkayga. Waxaan habsaday in aan la kulmi xisaabtayda. Qofkaasi wuxuu ku noolaan nolal laga raalli yahay. Wuxuuna geli janno sarreysa. Miraheeduna ay dhaw iyhiin. Cuna oo cabba adinka oo dhergaya wixi aad hormarsateen awgood maalmihii tegay. Qofkiise laga siiyo kitaabkiisa bidixdiisa waxa uu dhahayaa shallaytadeydaay la ima siin kitaabkaygi. Mana ogaan xisaabkaygu waxa uu yahay. Shalaytadaydaay hadday noqonlahayd dhammaad. Xoolahaygii waxba iguma tarin. Waxaa ba'ay awooddaydi. Qaada oo xira. Kadibna jaxiima gaarsiiya. Kolkaas silsilad balladhkeedu yahay toddobaatan dhudhun ku mara. Maxaa yeelay wuxuu ahaa mid aan rumayn Eebbe wayne﴾**[18-33]

فالكفر عاقبته خلود في النار، وهو أقبح ذنب يرتكبه الإنسان، وهو نقيض الإيمان الذي هو أفضل الأعمال التي تُشرفُ الإنسان.

Kolka kufriga cidhibtiisu waa naarta oo lagu waaro, waana dambiga ugu xun ee aadanuhu falo, waana iimaanka ka soo horjeedkiisa oo ah falalka kan ugu wanaagsan taas oo sharfaysa aadanaha.

وقد قسم أهل العلم والفهم الكفر إلى ثلاثة أقسام:

كفر قولي باللسان: كمسبة الله أو نبيٍّ أو ملكٍ، أو استخفاف بشيء من معالم الدين وشعائر الإسلام.

كفر فعلي بالجوارح: كرمي المصحف في القاذورات، والعياذ بالله، أو السجود لصنم.
كفر اعتقادي بالقلب: كظن أن الله جالس على العرش أو ساكن في السماء أو متحيزٌ في مكان، أو أنه ضوء أو روح.

والخلاص من الكفر يكون بالنطق بالشهادتين: "أشهد أن لا إله إلا الله وأشهد أن محمداً رسول الله"، وليس بقول أستغفر الله، كما أن المزح والغضب والجهل ليسوا عُذراً للكفر.

Culumaduna waxay u qaybisay kufriga saddex qaybood:

Kufriga dhawaqa ah ee carrabka: sida Eebbe caydiis ama nabi ama malak, ama fududaysiga wax ka mid ah arrimaha diinka iyo astaamaha islaamka.

Kufriga falka ah ee xubnaha: sida musxafka oo lagu tuuro qashinka, Magan Allee, ama sanam loo sujuudo.

Kufriga rumaysiga ah ee qalbiga: sida rumaynta in Eebbe carshiga dushiisa ku fadhiyo ama uu samada degganyahay ama uu ku jiro meel ama uu ilays yahay ama ruux.

Waxaana kufriga looga badbaadayaa in lagu dhawaaqo labada shahaado "Waxaan ka markhaati ahay in aan aan Ilaah xaq ah jirin Eebbe mooyee, waxaanna ka markhaati ahay in Muxammad Rasuulkii Eebbe yahay", mana aha in la yiraahdo "istaqfurullaah" sidoo kale kaftanka iyo carada iyo aqoon la'aanta cudurdaar kufrinta uma aha.

خاتمة

عظمة التوحيد، وعزُّ الإيمان، ونور اليقين، وشرف العبودية لله الواحد القهار، وسعة إعطاء الصبر، وطمأنينة التوكل على الله، وصفاء الإخلاص، ورفعة حسن الخلق... معان عظيمة.. عرفها الخلقُ من معلمي الخير وناشري الحكمة، أنبياء الله تعالى...

فأثبت أيها المؤمن على نهمهم وتعاليمهم حتى الممات، تفز برضوان الله عز وجل... .

Dhamaad

Towxiidka wayninkiisa, iyo iimaanka mudnaantiisa, iyo ilayska hubsashada, iyo shafta ay leedahay addoonnimada Eebbaha kalida ah ee awoodda badan, iyo laabfurraanta uu leeyahay sabarku, iyo degganaanta ay leedahay Eebbe tala saarashadiisu, iyo saafinimada daacadnimada, iyo sarraynta ay leedahay akhlaaq wanaaggu... waa macnayaal wayn.. uu ka bartay aadanuhu macalimiinta khayrka iyo kuwa xigmadda fidiya, ee ah nabiyada Eebbe kor ahaayee.. ee mu'minow ku nagow waddadoodii iyo cilmigoodii inta aad ka dhimato, si aad ugu guulaysato raallinimada Eebbe kor ahaayee...

خاتمة الخاتمة

وهكذا يتبين للإنسان، حكمة خلق الله له، وما هو المطلوب منه في هذه الدنيا، وما هو الهدف الذي ينبغي أن يسعى له، وما هو مصيره إن أساء، وما هو مصيره إن أحسن... .

قال الله تعالى: ﴿وَقُلِ اعْمَلُوا فَسَيَرَى اللَّهُ عَمَلَكُمْ وَرَسُولُهُ وَالْمُؤْمِنُونَ وَسَتُرَدُّونَ إِلَىٰ عَالَمِ الْغَيْبِ وَالشَّهَادَةِ فَيُنبِّئُكُمْ بِمَا كُنْتُمْ تَعْمَلُونَ﴾ [التوبة:105].
والله أعلم وأحكم بالصواب، وإليه المرجع والمآب.

Dhamaystirka Dhammaadka

Sidaa ayuuna ugu caddaanayaa dadka, xigmaddii uu Eebbe u khalqay darteed, iyo waxa asiga looga baahanyahay adduunkan dhexdiisa, iyo waxa ay tahay danta ay habboontahay in uu higsado, iyo waxa ay ciribtiisu noqonayso haddii uu xumaan falo, iyo waxa ay ciribtiisu ahaan haddii wanaag falo...

Wuxuu yiri Eebbe kor ahaayee: ﴿Waxaad dhahdaa howlgala waxaa arkaya Eebbe falkiinna e' iyo rasuulkiisa iyo mu'miniinta waxaana la idiin celin doonaa aqoonyahanka waxa dahsoo xaggiisa iyo waxa danjoogga ah kolkaas buu idiin sheegi wixii aad falijirteen﴾[at-Tawbah:105]

Eebbe ayaana og oo haleeli og wixii toosan, xaggiisa ayaana noqosho iyo yu'asho ahaatay.